

Warsidaha

ISGAARSIIN

Lix biloodle ay soo saarto Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka



R/Wasaare Xamsa oo dhagax dhigay xarunta Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

HIQ oo ku guuleysatay Shahaadooyin Caalami ah

Soomaaliya oo ka mid noqotay Hoggaanka Hay'ad Caalami ah

HIQ iyo IFC oo heshiis muhiim ah kala saxiixday



Warsidaha
ISGAARSIIN

Cinwaan:

@ : info@nca.gov.so

🌐 : <http://www.nca.gov.so>

📘 : Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

🐦 : @SomaliaNCA

CINWAANADA



23

R/Wasaaraha oo dhagax dhigay xarunta cusub ee HIQ



12

HIQ oo ku guuleysatay dhowr Shahaado oo Caalamiga ah



26

Fulinta Qorshaha Qaran ee Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga

29

HIQ iyo IFC oo heshiis muhiim ah kala saxiixday



8

Soomaaliya oo ka mid noqotay Hoggaanka Hay'ad Caalami ah



17

Mashruuca isku-xirka dhijitaalka Bariga Afrika



Warsidaha ISGAARSIIN

Warsidaha Isgaarsiin

Waa lix-biloodle ay soo saarto Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka. Waxaana lagu soo bandhigi doonaa waxqabadka hay'adda iyo wararka arrimaha Isgaarsiinta ee dalka.

Cinwaan:

@ : info@nca.gov.so

🌐 : <http://www.nca.gov.so>

📘 : Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

🐦 : @SomaliaNCA



- Qorshaha Istiraatiijiyadda Isbeddelka Awoodda Korjoogteynta HIQ
- Qorshaha Istaraatiijiyadda Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ee 2023-2027
- Qorshaha Qaran ee Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga
- Tilmaamayaasha Qiimaha Adeegyada Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada

*Qormooyinkan iyo kuwo
kaloo ka badan, ka agriso,
kalana soo deg boggeena:*

www.nca.gov.so

Ereyga Maareeyaha



Waxaa sharaf weyn ii ah inaan idin soo gudbiyo caddadkan cusub ee Warsidaha Isgaarsiinta, kaas oo ka tarjumaya waxqabadkii iyo guulihii muhiimka ahaa ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) sannadkan 2024.

Sanadkan, hay'addu waxay ku tallaabsatay horumarro muhiim ah oo waxtar u leh bulshada Soomaaliyeed. Waxaan ku faraxsanahay inaan ku guuleysannay matalaadda Soomaaliya ee guddi heer caalami ah oo hagi doona Hay'adda Talobixinta Caalamiga ah ee loogu talagalay xoojinta kaabayaasha isgaarsiinta ee xargaha badda hoosteeda mara. Sidoo kale, waxaan ku guuleysannay inaan markii ugu horreysay ka qaybgalno howlaha Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika, taas oo xoojinaysa iskaashiga gobolka.

Sidoo kale, waxaan ku faraxsanahay in hay'addu ay heshay shahaadooyin caalami ah oo ISO ah, kuwaas oo muujinaya heerka sare ee tayada shaqo ee aan ku gaarnay Maareynta Tayada, Amniga Xogta, iyo Ilaalinta Xogta Shaqsiga ah.

Intaa waxaa dheer, hay'addu waxay dadaal gelisay diyaarinta qorsheyaal istiraatiiji ah oo horseedaya horumar waara. Hay'addu qabatay Madashii Labaad ee Amniga Internetka Soomaaliya, taas oo ujeedkeedu ahaa xoojinta amniga dhijitaalka ah ee dalka, iyo sidoo kale tabantaabinta Madasha Hab-maamulka Internetka Soomaaliya, si loo hagaajiyo wada-shaqeynta iyo iskaashiga daneeyaasha kala duwan ee internetka dalkeenna.

Waxaan halkan uga mahad celinayaa dhammaan shaqaalaha iyo agaasimayaasha HIQ ee suurogeliyay waxqabadkan muuqda, sidoo kale waxaa mahad gaar ah u celineynaa Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Mudane Xil. Maxamed Aadan Macallin Cali, oo hoggaankiisa iyo dhiirrigelintiisa door muhiim ah ka ciyaaray guulaha aan gaarnay.

Waxaan rajeynayaa inaad caddadkan aad ka bogan doontaan macluumaadkaa qiimaha leh ee ku saabsan waxqabadka iyo hiigsiga Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

Mahadsinidiin

Mustafa Yaasiin Sheekh

*Maareeyaha Guud
Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka*

Warsidaha ISGAARSIIN



Sanadka 2aad
Caddadka 3aad
Janaayo - Diseembar, 2024



"Ka sokow inuu warsidahani yahay goob aan ku ururino, ku keydino, kuna soo bandhigno waxqabadka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, haddana wuxuu noqon doonaa goob laga dheehan doono gudashada waajibaadkeena iyo xilka aan u hayno ummadda Soomaaliyeed."

Mustafa Yaasiin Sheekh

Maareeyaha Guud
Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka



Erayga Tifaftiraha

As-salaamu Calaykum dhammaan akhristayaasheenna qiimaha leh,

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Eebbe, noo suurtageliyay soo saarista caddadka saddexaad ee warsidaha Isgaarsiin. Wargeyskaan, oo ah warsidaha rasmiga ah ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), wuxuu xambaarsan yahay warbixinno muhiim ah oo ku saabsan waxqabadka hay'adda, horumarada socda, iyo qorsheyaasha ay hiigsanayso mustaqbalka.

Kooxda tifaftirka iyo qorayaasha, oo aan hoggaaminayo, waxaa naga go'an inaan soo ururinno xog sax ah, qorno, isla markaana aan tifaftirno warbixinno si hufnaan iyo daacadnimo leh loo diyaariyay.

Mas'uuliyaddenna ugu horreysa waa inaan hubinno in dhammaan xogaha aan soo

bandhigno ay yihiin kuwo sax ah oo si dhab ah loo xaqiijiyay, si aan u abuurno kalsooni buuxda oo ku saabsan waxyaabaha aan soo gudbineyno.

Sidoo kale, waxaan xoogga saarnaa tayeynta qoraallada, annagoo doorbidna in erayada iyo jumladaha aan isticmaalno ay noqdaan kuwo nuxur leh, qurux badan, oo fudud in la fahmo.

Waxaan rajeynayaa in akhrinta caddadkan ay noqoto mid xiiso leh oo aad ka heli doontaan warbixinno qiimo leh oo ku saabsan horumarada socda iyo yoolalka mustaqbalka ee HIQ.

Aqris wanaagsan

Nasro Cabdi Cusmaan
Tifaftiraha Warsidaha Isgaarsiinta

XILWAREEJINTII WASIIRKA

Ra'iisul Wasaare ku-xigeenka XJFS Mudane Saalax Axmed Jaamaca, ayaa xilalka u kula wareejiyey Wasiirka cusub ee Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada Mudane Xildhibaan Maxamed Aadan Macallin Cali (Soomaali) iyo Wasiirkii hore ee Wasaaradda Mudane Jaamac Xasan Khaliif.

Munaasabadda xilwareejinta waxaa ka soo qeybgalay Wasiiru-dowlaha Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada Xildhibaan Axmed Cismaan Diiriye, xildhibaan ka tirsan labada aqal, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Mudane. Cabdicasiis Duwane Isaaq, Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, Ku-xigeenka Maareeyaha Hay'adda Dhowrista Xogta Qaranka, Xafiiska Hanti-dhowrka Guud ee Qaranka, Agaasime Waaxeedyada, La-taliyaasha iyo marti sharaf kale.





KORMEERKII WASIIRKA

Ee Xarunta Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada XFS Xildhibaan Maxamed Aadan Macallin Cali (Soomaali) ayaa booqasho kormeer ah ku tagay Xarunta Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, waxaana ku soo dhaweyey Maareeyaha guud ee Hay'adda Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh iyo Maareeye ku-xigeenka Mudane Axmed Cali Salaad.

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh ayaa Sheegay in ay ku faraxsan yihiin booqashada wasiirku ku yimid xarunta hay'adda.

Wasiirka ayaa intii uu xarunta joogay soo kormeeray qaybaha kala duwan ee ay hay'addu ka kooban tahay, isagoo u kuurgalay sida ay shaqada qaybahaas u socdaan. wuxuuna halkaasi warbixinno ku saabsan sida ay u socdaan shaqooyinka iyo howlaha hay'adda kaga dhagaystay madaxda qaybahaas.

Intaa kaddib wasiirka ayaa kulan gaar ah la yeeshay shaqaalaha iyo madaxda qaybaha kala duwan ee hay'adda, wuxuu uga horreyn uga mahadceliyey soo dhoweyntooda wanaagsan, wuxuuna ku ammaanay dadaalka dheeraadka ah iyo shaqooyinka wanaagsan ee ay u hayaan dadka iyo dalka.

Dhinaca kale wasiirku wuxuu ku booriyay madaxda iyo shaqaalaha hay'adda inay sii labajibbaaraan howlaha muhiimka ah ee ay ummadda u hayaan.





NOA



Soomaaliya

oo ka mid noqotay

Hoggaanka Hay'ad Caalami ah

Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa loo doortay inuu ku metelo dalkeena xubinnimada guddi heer caalami ah oo hagi doona Hay'adda Talobixinta Caalamiga ah ee loogu talagalay xoojinta kaabayaasha isgaarsiinta ee xargaha badda hoosteeda mara (the International Advisory Body for Submarine Cable Resilience).

In Soomaaliya loo doorto xubinnimada guddigan ayaa muujinaysa doorka sii kordhaya ee dalkeenu uu ku leeyahay wadhadalka caalamiga ah ee ku saabsan ilaalinta iyo horumarinta kaabayaasha muhiimka ah ee isgaarsiinta, taas oo haatan u badan xargaha badda hoosteeda mara.

Hay'addan La-talinta, oo ay si wadajir u aasaaseen Hay'adda Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU) iyo Guddiga Ilaalinta Kaabayaasha Isgaarsiinta Badda Hoosteeda - International Cable Protection Committee (ICPC), ayaa diiradda saaraysa baahida degdegga ah ee lagu xoojinayo xargaha badda hoosteeda, kuwaas oo qaada in ka badan 99% xogta caalamiga ah ee la isdhaafsado.

Hay'addan ayaa door muhiim ah ka qaadanaaya la dagaallanka khataraha sii kordhaya ee dhinaca amniga iyo caqabadaha juquraafiyeed ee saameeya kaabayaasha muhiimka ah ee isgaarsiinta adduunka.

Hambalyada Mas'uuliyiinta Dowladda & Shirkadaha Isgaarsiinta



**Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada,
Mudane Maxamed Aadan Macallin Cali
(Soomaali):**

"Doorashadan waxay astaan u tahay horumarka iyo doorka muhiimka ah ee Soomaaliya ku leedahay masraxa caalamiga ah ee isgaarsiinta. Mudane Mustafa waxa uu dalkeenna ku meteli doonaa si sharaf leh, isagoo horumarin doona isku xirnaanta caalamiga ah iyo kaabayaasha muhiimka ah ee isgaarsiinta."



Guddoomiyaha Ku-xigeenka Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka, Boostada iyo Isgaarsiinta, Mudane Maxamed Xasan Maxamed:

"Aniga oo ah Guddoomiye Ku-xigeenka islamarkaana ku hadlaya magaca Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka, Boostada iyo Isgaarsiinta, waxaan u hambalyeynayaa Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh oo loo doortay inuu ku metelo dalkeenna guddiga talo-bixinta caalamiga ah ee xoojinta kaabayaasha isgaarsiinta badda hoosteeda. Doorashadan muhiimka ah waa mid astaan u ah guulaha Soomaaliya ka gaartay kaabayaasha isgaarsiinta iyo iskaashiga caalamiga ah."



HORMUUD TELECOM:

"Waxaan si gaar ah hambalyo ugu direynaa Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, oo kursigan ku metelaya Soomaaliya. Doorashadan taariikhiga ah waxay caddeyneysaa hoggaankiisa iyo doorka Soomaaliya ee horumarinta isgaarsiinta caalamiga ah. Waxaan rajeyneynaa inuu si milgo leh ugu adeego mas'uuliyaddan culus."



SOMTEL SOMALIA:

"Waxaan si kal iyo laab ah ugu hambalyeynaynaa Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, oo loo doortay inuu Soomaaliya ku metelo guddigan heer caalami ah. Doorashadan waxay astaan u tahay guusha Soomaaliya ee heer caalami. Waxaan u rajeyneynaa inuu si hufan uga qaybqaato hawlaha guddigan muhiimka ah."



AMTEL:

"Waxaan si gaar ah ugu hambalyeynaynaa Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, oo loo doortay inuu ku metelo dalkeenna xubinimada guddiga heer caalami ah ee hagi doona Hay'adda Talo-bixinta Caalamiga ah ee loogu talagalay xoojinta kaabayaasha isgaarsiinta ee xargaha badda hoosteeda mara (the International Advisory Body for Submarine Cable Resilience).



Mustafa Yaasiin
Maareeyaha Hay'adda
Isgaarsiinta Qaranka



Axmed Max'ud Yuusuf
Guddoomiyaha
Hormuud Telecom



Maxamed Aadan Faarax,
Maamulaha Guud ee
Hormuud Telecom

HAY'ADDA ISGAARSIINTA oo ka qeybgashay daahfurka Adeegga 5G EE Shirkadda Hormuud

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka, Dr. Xasan Sheekh Maxamuud, ayaa ka qeybgalay xaflad lagu daahfurayay adeegga 5G ee Shirkadda Hormuud.

Daahfurkan ayaa ku soo aaday, iyadoo dhowaan Hay'adda Isgaarsiinta Qaranku ay soo gabagabeysay qorshaha iyo istaraatiijiyadda Qaran ee lagu hagayo adeegsiga 5G, kaas oo soo billowday billowgii sanadkii 2023kii.



Qorshaha iyo Istaraatiijiyadda ayaa looga gol leeyahay sidii shirkad kasta loogu asteyn lahaa mowjadaha 5G ee ay isticmaali doonto si looga fogaado is-dhexgal khalkhal gelin kara adeegyada, isla markaana la waafajiyo nidaamyada caalaamiga ah ee uu go'aamiyay Midowga Isgaarsiinta Adduunka (ITU), si loo ilaaliyo danaha macaamiisha iyo shirkadaha isgaarsiinta oo adeeggan maalgashi ballaaran ku sameynaya intaba.

Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Md. Mustafa Yaasiin Sheekh, oo ka hadlay xafladda, ayaa ammaanay kaalinta shirkadda Hormuud ay kaga jirto isgaarsiinta dalka, isagoo intaasi ku daray in horumarka laga gaaray nidaaminta isgaarsiinta dalka ay ku timid wadashaqeynta wanaagsan ee ka dhexeysa Hay'adda Isgaarsiinta iyo shirkadaha isgaarsiinta oo ay ka mid tahay shirkadda Hormuud.

Maareeyaha ayaa ugu dambeyntii ku bogaadiyay juhdiga iyo maalgelinta ay Shirkadda Hormuud gelisay sidii adeeggan dalka loo keeni lahaa, wuxuuna sheegay inuu rajeynayo in adeeggan uu wax weyn ku soo kordhin doono adeegyada la xiriira isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka.



- ✓ ISTARAA TIJIYADDA QARAN EE JILKA SHANAAD 5G
- ✓ ISTARAA TIJIYADDA QARAN EE INTERNET BOROTOKOOLKA NOOCA LIXAAD (IPV6) EE SOOMAALIYA
- ✓ WARBIXINTA SANADLAHA 2023 2024

Qormooyinkan iyo kuwo kaloo ka badan, ka aqriso, kalana soo deg boggeena:

www.nca.gov.so



HOGGAANKA SARE EE Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika (EACO) oo Muqdisho yimid



Ujeeddada wafdigu waxay ahayd inay ka soo war doonaan xaaladda isgaarsiinta dalka iyo siyaasadaha la xiriira. Waxaan rajeyneynaa in booqashadan kaddib aan si buuxda uga wada qeyb qaadan doonno howlaha kale ee isgaarsiinta ee Bariga iyo Bartamaha Afrika.



Mustafa Yaasiin

Wafdi sare oo ka socda Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika (EACO), oo uu hoggaaminayo Agaasimaha Ururka, Dr. Ally Yahaya Simba, ayaa booqasho rasmi ah ku yimid Soomaaliya.


Wafdigu waxa ay booqdeen Xarumaha Dhexe ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, halkaas oo ay kulamo kula qaateen mas'uuliyiin ay ka mid yihiin Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Mudane Xildhibaan Maxamed Aadan Macallin Cali, iyo Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh.

Maareeyaha Guud, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa faahfaahin ka bixiyay ujeedka safarka wafdiga ee Soomaaliya. "Ujeeddada wafdigu waxay ahayd inay ka soo war doonaan xaaladda isgaarsiinta dalka iyo siyaasadaha la xiriira. Waxaan rajeyneynaa in booqashadan kaddib aan si buuxda uga



wada qeyb qaadan doonno howlaha kale ee isgaarsiinta ee Bariga iyo Bartamaha Afrika, taas oo naga saacadaysa inaan helno fursado la xiriira isweydaarsiga fikradaha, midaynta shuruucda isgaarsiinta, iyo sidoo kale in shirkadaha Isgaarsiinta dalkeenna ay ka qeyb qaataan horumarka baaxadda leh ee gobolka Bariga Afrika," ayuu yiri Mudane Mustafa.

Dhinaca kale Agaasimaha EACO, Dr. Ally Yahaya oo kulanka ka hadlay



Maareeye Mustafa oo gacan qaadaya Dr. Ally Yahya Simba



ayaa amaanay horumarka isgaarsiinta Soomaaliya. Waxaana uu yiri: "Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan Muqdisho joogo. Waxaan ku faraxsanahay horumarka ICT-da ee Soomaaliya, gaar ahaan qiimaha jaban ee adeegyada ICT-da oo aad ii soo jiidatay.

Waxaan aaminsanahay ka gobol ahaan in annaga oo wada shaqeynayna aan si wadajir ah u horumarin karno qeybta ICT-da si ay faa'iido ugu noqoto muwaadiniinta dalalkeenna"

Ugu dambeyntii, Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Mudane Xildhibaan Maxamed Aadan Macalin Cali, ayaa wafdiga uga mahadceliyay booqashadooda isagoo xusay sida Soomaaliya ugu diyaar garowday inay ka faa'iideysato khibradaha iyo aqoonta dalalka xubnaha ka ah EACO.

Booqashada wafdiga ayaa qayb ka ah dadaallada xoojinta xiriirka iyo wada-shaqeynta gobolka ee dhinaca Isgaarsiinta.

Kulanka Shirkadaha Isgaarsiinta iyo wafdiga EACO



Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa Muqdisho ku qabatay kulan muhiim ah oo dhexmaray shirkadaha isgaarsiinta dalka iyo wafdigi Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika (EACO).

Kulanka oo ay goob-joog ka ahaayeen Madax ka tirsan Shirkadaha Isgaarsiinta dalka, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, iyo Xoghayaha Guud ee Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika, Dr. Ally Yahya Simba, ayaa looga wadahadlay sidii loo xoojin lahaa iskaashiga iyo wax wadaqabsiga ka dhexeeya EACO iyo Soomaaliya.

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mustafa Yaasiin Sheekh, oo hadal ka jeediyay kulanka ayaa yiri, "Ku biirista Soomaaliya ee Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika waxay fursad weyn u tahay dalkeena, iyadoo aan ka faa'iidayaan karno khibradaha iyo taageerada ururka si aan u horumarino isgaarsiinta iyo kaabeyaasha dhaqaalaha dhijitaalka ah ee dalka.

Waan ku faraxsanahay in aan marti-gelinno wafdiga EACO, waxayna naga go'an tahay in aan sii xoojino xiriirka muhiimka ah."

Dhankiisa, Dr. Ally Yahya Simba, Xoghayaha Guud ee Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika, oo ku hadlayay magaca wafdiga, ayaa cadeeyay in booqashadooda Muqdisho ay ka dhalatay casumaad rasmi ah oo ay ka heleen Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

"Ururka EACO waxaa ka go'an in uu taageero buuxda siiyo Soomaaliya, si loo horumariyo isgaarsiinta iyo kaabeyaasha muhiimka ah, waana rajeynayaa in iskaashiga labada dhinac uu keeni doono guulo la taaban

karo". ayuu yiri Dr. Ally.

Mas'uuliyiin ka kala socotay shirkadaha isgaarsiinta ee ka qeybgalay kulanka ayaa si diiran u soo dhaweeyay qorshaha lagu xoojinayo xiriirka iskaashi ee labada dhinac, iyadoo muujiyay sida ay diyaar ugu yihiin in ay qayb ka noqdaan dadaallada lagu horumarinayo isgaarsiinta iyo kaabeyaasha dhaqaalaha ee dalka.

Gabagabadii kulanka ayaa waxaa la isku raacay in la dardargeliyo wada-shaqeynta ka dhaxeysa Soomaaliya iyo Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika, taas oo la filayo in ay fursado badan u furto horumarinta isgaarsiinta ee dalka iyo guud ahaan gobolka.





MADASHA AMNIGA INTERNET-KA SOOMAALIYA



Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada ayaa soo geba-gabeeyay Madashii Labaad ee Amniga Internet-ka Soomaaliya, oo muddo labo maalmood ah ka socotay magaalada Muqdisho.

Madashan, oo sanadkiiba mar la qabto, ayaa sanadkan si gaar ah diiradda loogu saaray sidii loo xoojin lahaa iskaashiga dhaxalgalka ah ee Dowladda, shacabka, iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay si looga hortago dambiyada internet-ka loona xaqiijiyo amniga internet-ka ee dalka.

Waxaa ka soo qeybgalay khubarro iyo mas'uuliyiin ka socda Dowladda, shirkadaha isgaarsiinta iyo teknolojiyada, bixiyeyaasha adeegga internet-ka, bangiyada, iyo ururada bulshada, kuwaas oo doodo muhiim ah ka yeeshay halista ka imaan karta internet-ka iyo

xalalka lagu xoojin karo amniga internet-ka. Madashan ayaa sidoo kale lagu soo bandhigay cilmi-baarisyo iyo xalal cusub oo lagu horumarinayo amniga internet-ka.

Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Xildhibaan Maxamed Aadan Macallin Cali (Soomaali), ayaa si rasmi ah u furay madasha. Wuxuu ka hadlay horumarka laga gaaray madashii sanadkii hore, shuruucda cusub ee amniga internet-ka oo dhawaan la horgeeyay Golaha Wasiirada iyo Baarlamaanka, iyo muhiimadda ay madashan leedahay. Wasiirku wuxuu hoosta ka xarriiqay dadaallada joogtada ah ee lagu dhisayo siyaasado iyo nidaamyo xoojinaya amniga internet-ka ee Soomaaliya.

Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, oo si rasmi ah u soo xiray madasha maallintii labaad, ayaa u mahadceliyay dhammaan ka qeybgalayaasha madasha, isagoo bogaadiyay doorkii muhiimka ahaa ee ay ka qaateen doodaha iyo talooyinka laga bixiyay Madasha Amniga Internet-ka Soomaaliya.



“Waxaan si qoto dheer u qadarinayaa talooyinka qiimaha badan ee aad soo jeediseen. Waxay dhammaantood muhiim u yihiin horumarinta nidaamyada amniga internet-ka Soomaaliya”. ayuu yiri Maareeyaha.

Madashan ayaa lagu tilmaamay tallaabo weyn oo Soomaaliya u qaadday dhanka kobcinta siyaasadaha iyo nidaamyada lagu xaqiijinayo amniga internet-ka.



HIQ

oo ku guuleysatay Shahaadooyin Caalami ah

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa u dabaaldegtey hanashada seddax shahaado caalami ah oo ISO ah oo uu bixiyo Ururka Halbeegyada Caalamiga (ISO).

Shahaadooyinka ISO ee ay heshay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waa:

1. **ISO 9001:2015** – Nidaamka Maareynta Tayada (QMS)
2. **ISO 27001:2022** – Nidaamka Maareynta Amniga Xogta (ISMS)
3. **ISO 27701:2019** – Nidaamka Maareynta Xogta Shaqsiga ah (PIMS)

Xafladda ayaa waxaa goobjoog ka ahaa wakiillo kala duwan, oo ay ku jireen xubno ka tirsan baarlamaanka, wasiirro ka tirsan xukuumadda, guddoomiyaal, agaasimayaal guud, iyo wakiillo ka socday shirkadaha isgaarsiinta, jaamacadaha, bangiyada, iyo ururrada bulshada rayidka ah.

Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, ayaa yiri: “Helidda shahaadooyinkan caalamiga ah ee ISO waxa ay ahayd geeddi-socod adag, taas oo muujinaysa guulaha ay gaartay Hay'adda. Waxay ka tarjumaysaa sida ay nooga go'an tahay hufnaan iyo daacadnimo shaqo.”

Wuxuu sidoo kale xusay, “Shahaadooyinkan waxay la jaanqaadayaan yoolalka istiraatiijiyadeed ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ee sanadaha 2023 ilaa 2027, kuwaas oo ka mid ah xoojinta awooddeenna maamul iyo heerarka fulinta hawlaha si ay u waafaqaan heerarka caalamiga ah. Guushan waxay sare u qaadaysaa kalsoonida dhinacyada kala duwan ee aanu la shaqeyno, laga soo bilaabo bulshada ilaa shirkadaha isgaarsiinta.”

Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Mudane Max'ed Aadan Macallin Cali, ayaa ammaanay dadaalada hay'adda, wuxuu yiri: “Waa wax lagu farxo in muddo sanad gudihis ah ay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ku guuleysato seddax shahaado oo ISO ah”.

“Tani waxay muujineysaa sida ay hay'addu uga go'an tahay horumarinta maamulka isgaarsiinta iyo teknolojiyada ee Soomaaliya.” ayuu hadalkiisii sii raaacsaday.

Shahaadooyinkan waxay ka dhigayaan Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka hay'addii ugu horreysay ee dawladdeed ee Soomaaliya oo hesha shahaadooyinka ISO, iyadoo inta badan ay isticmaalaan shirkadaha gaarka loo leeyahay, laakiin ay sii kordhayaan muhiimada ay u leeyihiin hay'adaha dadweynaha.

Munaasabadda ayaa ku dhammaatay si heer sare ah, iyadoo ka qeybgalayaashu muujiyeen xiisahooda ku saabsan horumarka hay'adda ee kor u qaadista tayada adeegyada ICT-da dalka.





Sawirada Xaflladda Bandhigga shahaadooyinka



U-diyaargarowga Garaadka Macmalka

Tallaabooyinka ay Soomaaliya u baahan tahay in ay qaaddo si ay ugu diyaar garowdo horumarka Garaadka Macmalka ah.

Garaadka Macmalka ah (AI) wuxuu si degdeg ah u beddelayaa Teknolojiyada caalamka, isagoo soo bandhigaya fursado iyo caqabado aan horay u jirin oo ay wajahayaan dawladaha, ganacsiyada, iyo bulshada. Garaadka Macmalka ah wuxuu awood u leeyahay in uu kordhiyo horumarka qeybaha muhimka u ah dhaqaalaha dalka, sida teknolojiyada, caafimaadka, waxbarashada, beeraha iyo nidaamyada maaliyadda.

Si looga faa'ideyso, iyadoo la yareynaayo khataraha ka imaan kara, waxaa loo baahanyahay in laga horumariyo qaabdhismeed sharci oo nidaaminaya teknolojiyadan cusub ee Garaadka Macmalka ah. Shuruucda hagta nidaamyada dhijitaalka ee hadda dalka ka jira waa laba sharci oo muhiim ah; Sharciga Isgaarsiinta Qaranka (2017) iyo Sharciga Ilaalinta Xogta (2022).


Labadan sharci waxay ay nidaaminayaan teknolojiyada isgaarsiinta ee dalka, iyo sidoo kale ilaalinta xogta shaqsiga ah. Laakiin labadan sharci keliya kuma filna si loola falgalo caqabaha ka imaan kara teknolojiyada garaadka macmalka iyo dhibaatooyinka dhinaca anshaxa ee ka imaan kara.

Fahamka Kaalinta Garaadka Macmalka ah ee Horumarinta Dalka

Garaadka Macmalka wuxuu gacan ka geysan karaa dadaallada horumarinta iyo dib-u-dhiska dalka, isagoo xal hal-abuur leh u keenaya caqabadaha muddada dheer ka taagan Soomaaliya. Wuxuu kordhinayaa wax soo saarka beeraha, bixinta adeegyada kala duwan ee bulshada u baahan tahay, kobcinta ganacsiga gaarka loo leeyahay.

Qeybta beeraha, Garaadka Macmalka ah wuxuu fududeynayaa falanqeynta saadaasha cimilada iyo wax soo saarka dallaga iyo maareeynta kheyraad, si Soomaaliya ay u gaarto isku filnaansho dhinaca cuntada ah. Dhinaca Teknolojiyada, Garaadka Macmalka ah wuxuu hagaajin karaa shabakadaha isgaarsiinta, iyo ballaarinta kaabayaasha dhijitaalka.

Artificial Intelligence



Sidoo kale, dhinaca waxbarashada waxaa looga faa'ideysan karaa oo uu soo kordhinayaa in la helo hab fudud oo ardayda ku heli karaan waxbarasho tayo leh, iyadoo iskuullada ay soo kordhin karaan qaab waxbaris oo shakhsi ah. Sidoo kale wuxuu fududeyn karaa in waxbarashada ay gaarto meelo aysan hadda gaarsiisneen, taasoo yareyneysa farqiqa waxbarsho ee u dhexeeyo bulshada kala duwan.

Sidoo kale, Garaadka Macmalka wuxuu ka qeybqaadanayaa horumarinta iyo hagaajinta nidaamyada maaliyadeed ee dalka, sida bankiyada, hal-abuurka Teknolojiyada Maaliyadeed (Fintech), ka hor tagga khataraha maaliyadeed, iyo fududeynta in la helo nidaam maaliyadeed oo loo dhan yahay (Financial inclusion).

In kastoo ay jiraan fursadadaas horumarineed, haddaan la helin xeernidaamin dhammeystiran oo la xiriirta Garaadka Macmalka ah, waxa ay keeni kartaa khataro aan sahlaneyn, sida arrimaha anshaxa, isticmaalka qaldan ee Garaadka Macmalka ah, ku xadgudubka xogta shakhsiga ah, iyo mas'uuliyad la'aanta ka dhalan karta go'aannada ay gaaraan nidaamyada ku shaqeyaa Garaadka Macmalka ah.

Nidaamka Sharci iyo Maamulka ee Hadda Jira ee Soomaaliya

Shuruucda hadda jira ee nidaaminaya Garaadka Macmalka ah waxaa ka mid ah Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, oo ah midka hagaaga suuqa isgaarsiinta dalka, sida rukhsad bixinta, maareynta hirarka isgaarsiinta, isku xirka shirkadaha isgaarsiinta iyo horumarinta kaabayaasha isgaarsiinta.

Inkastoo sharcigan uu muhiim u yahay horumarinta isgaarsiinta dalka, haddana kuma jiraan qodobka hadlaaya daahfurnaanta hannaanka barnaamijyada (Algorithm Transparency), iyo kala xadeynta mas'uuliyadaha. Sidoo kale ujeedka Sharciga Ilaalinta Xogta waa ilaalinta xogta shaqsiga, taas oo ah qeyb muhiim u ah nidaamyada ku shaqeyaa Garaadka Macmalka, kuwaas oo ku shaqeyaa xogta badan ee ay aruuriyaan, kuna shaqeyaan.

Laakiin, sharciga ma qeexayo caqabadaha ka imaan kara ku xadgudubka xogta shaqsiga ah ee ay geystaan nidaamyada ku shaqeyaa garaadka macmalka ah iyo anshaxa. Intaa waxaa dheer, qaab dhismeedka xeerarka amniga internetka oo weli bilow ah oo aan la meel marin, kuwa hadda qabyada ahna aysan ka soo muuqan caqabaha amni ee garaadka macmalka ah.

Casharada Laga Baran Karo Dunida Kale

Si loo horumariyo qaab-dhismeed xeernidaamineed (Regulatory Frameworks) wax ku ool ah oo lagu oo lagu nidaamiyo Garaadka Macmalka ah, Soomaaliya waxay ka baran khibrada dalalka kale ee bilaabay in ay horumariyaan qaab-dhismeedka xeernidaamineed.

• Xeerka Garaadka Macmalka ee Midowga Yurub:

Sharciga Garaadka Macmalka ee Midowga Yurub wuxuu tusaale u yahay qaab-dhismeed xeernidaamineed oo ku saleysan halisaha (Risk-based Regulatory Approach), isagoo u kala saaraya nidaamyada Garaadka Macmalka ah heerka waxyeelo suurtoogalka ah ee ay geysan karaan, kaddibna ku soo rogaya hab nidaamin iyo kormeero oo ku habboon. Habka Midowga Yurub qaatay wuxuu diiradda saarayaa daahfurnaanta, cadaaladda (fairness), iyo in qof bani'aadam ah uu kormeero nidaamyada macmalka ah,

• Hab-nidaaminta Garaadka Macmalka ee Ingiriiska

Nidaamka Garaadka Macmalka ah ee Boqortooyada Ingiriiska wuxuu isku dheellitirayaa kor u qaadista hal-abuurka, hubinta kalsoonida shacabka iyo amniga dadweynaha. Sidoo kale habkaan wuxuu dhiirigelinayaa in la abuurro hab-xeernidaamineed oo dabacsan oo fududeynaya iskaashiga dowladda iyo shirkadaha teknoolajiyada, si aan caqabad loogu noqon horumarka iyo hal abuurka Garaadka Macmalka ah.

• Nidaminta Garaadka Macmalka ee Kenya

Dalka Kenya ayaa wada dadaallo lagu cusbooneysiinayo xeerarkeeda dhijitaalka, si loogu soo daro xeer-nidaaminta Garaadka Macmalka ah, loona waafajiyiyo kuwa caalamiga ah.

Meelaha Muhiimka ah ee Dib-u-habaynta Xeerarka Soomaaliya

Si loo dejiyo qaab-dhismeed xeer-nidamineed dhammeystiran oo ku saabsan Garaadka Macmalka ah, Soomaaliya waa inay diiradda saartaa dhowrkan arrimood ee muhiimka ah:

1. Anshaxa Isticmaalka Garaadka Macmalka ah

Qaab-dhismeedka ka xeer-nidamineed waa in uu waajib ka dhigaa hubinta daahfurnaanta, caddaaladda, iyo mas'uuliyadda go'aan qaadashada ee nidaamyada ku shaqeeya Garaadka Macmalka ah. Sidoo kale, waxaa muhiim ah in dhammaan dadka ay fahmi karaan qaabka hab-ka barnaamijta ku shaqeeyaan (Algorithms) iyo sida ay u isticmaalayaan xogta ay aruuriyaan.

Sidoo kale xeer-nidaamintu waa in ay soo kordhisaa qaab wax looga qaban karo waxyeellada iyo khaladaadka ay geystaan nidaamyada ku shaqeeya Garaadka Macmalka ah. Sidoo kale Soomaaliya waa in ay dhaqangelisaa qiimeynta caddaaladeed (fairness assessment), si looga hortago natiijooyinka takooran (biased outcomes), gaar ahaan dhinacyada adeegyada caafimaadka iyo laamaha amniga.

2. Ilaalinta Xogta iyo Amniga

Ku-tiirsanaanta Garaadka Macmalka ee xogta ballaaran (Big Data) ee shacabka laga aruuriyo waxay u baahan tahay ilaalin adag oo ku saabsan xogta shakhsiga iyo ilaalinta amnigeeda. Sharciga Ilaalinta Xogta ee Soomaaliya waa in dib u eegis lagu sameeyo si wax looga qabto caqabadaha gaarka ah ee Garaadka Macmalka, iyadoo la hubinayo keydinta iyo habaynta xogta si ammaan ah.

In la sameeyo siyaasado cadcad oo qeexaya habka ogolaanshaha isticmaalka xogta iyo habraacyo maamul si looga hortago isticmaalka xogta fasax la'aan (Data Mining).

3. Isticmaalka Garaadka Macmalka ah ee Adeegyada Dadweynaha

Garaadka Macmalka wuxuu hagaajin karaa waxtarka iyo hufnaanta adeegyada dadweynaha, oo ay ka mid yihiin maamulka adeegga dadweynaha, hagaajinta nidaamyada caafimaadka iyo waxbarashada. Xeerarka waa inay hubiyaan in Garaadka Macmalka uu ku shaqeeyo si mas'uuliyad iyo sinnaan leh, iyadoo laga hortagayo in adeegyada aysan gaarin dadka nugul. Xeer-nidaaminta loogu talagalay isticmaalka Garaadka Macmalka waa inay dhiirrigeliyaan daahfurnaanta oo ay ilaaliyaan xuquuqda muwaadiniinta.

4. Dhiirigelinta Hal-abuurka iyo Maalgashiga

Dib u habeynta xeerarka Dhijitaalka ee Soomaaliya waa in ay abuuraan jawi dhiirigelinaya hal-abuurka iyo maalgashiga. Hindisayaasha dhiirigelin kara hal-abuurka waxaa ka mid ah; so kordhinta sanduuqyada hal-abuurka (Innovation sandboxes), dhiirigelinta shirkadaha cusub (startups), iyo iskaashiga dowladda iyo shirkadaha si loo kordhiyo maalgelinta Garaadka Macmalka ah.

Sidoo kale, asaasidda machadka cilmi baarista ee Garaadka Macmalka si Soomaaliya uga qeybqaadato nidaamka dhaqaalaha cusub ee ku dhisan Garaadka Macmalka ah.

Gunaanad

Dib-u-habeynta qaab-dhismeedka sharci ee Soomaaliya si wax looga qabto caqabadaha uu keeni karo Garaadka Macmalka ah waa lagama maarmaan si loo dhiirrigeliyo hal-abuur mas'uuliyad leh, loona xaqiijiyo horumar qaran, waa in wax laga barato khibradaha xeer-nidaaminta ee caalamka ka jira. Soomaaliya waxay abuuri kartaa qaab-dhismeed xeernidaamin oo la jaanqaadi kara teknoolajiyada cusub, dhiirigelinayana hal-abuurka iyo maalgashiga.

Qaab-dhismeedka ka xeernidaamineed waa inuu ilaaliya anshaxa, xogta shakhsiga ah, iyo dhisidda kalsoonida dadweynaha. Sidoo kale, waa inuu fududeeyaa iskaashiga istiraatiijiyeed ee ka dhexeeye dowladda iyo ganacsata, si Soomaaliya ay uga mid noqoto dalalka ka faa'ideysta teknoolajiyadan cusub.

WQ: Eng. Liibaan C/Qaadir Sh. Qaasim



Habeenkii Abaalmarinta

Waa habeen xiiso badan oo dhammaan shaqaalaha iyo madaxda HIQ ku kulmaan casho Sharaf qiimo badan. Waa habeen dib loo milicsado waxqabadka sanadkan 2024. Waa habeen hadafkiisu yahay dhiirigelinta shaqaalaha hay'adda iyo abaalmarinta inta kartida dheeraadka muujisay.



Kulanka Cashada ayaa waxaa goobjoog ka ahaa Maareeyaha Guud ee Hay'adda, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, lataliyaasha, madaxqeybeeyada, iyo howlwadeennada hay'adda.



Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, oo kulanka cashada daahfuray, ayaa sheegay in sannadkan uu ahaa mid guulo badan laga gaaray howlaha hay'adda, isagoo xusay in shaqaalaha hay'adda aysan isku koobin oo keliya waajibaadkooda shaqo ee hay'adda, balse ay taageero muhiim ah siiyeen hay'adaha kale ee dowladda, iyagoo waayo-aragnimadooda ku biiriyay howlahaas.



Wuxuu yiri: "Kulankani waa kulan u dabaaldeg waxqabadkii fiicnaa ee sannadkan 2024-ka. Waxaa noo qabsoomay shaqooyin badan, waxaan ku faaneynaa in qaar howlwadeennadeenna sannadkan howlaha hay'adda ka sokow iney caawiyeen dhowr hay'adaha dowladda kamid ah oo waayo-aragnimadooda ku taageereen."



Munaasabaddan waxaa lagu soo gunaanaday abaalmarinta shaqaalihii kartida dheeraadka ah muujiyay.



Aqoon isweydaarsi

Hay'adaha Isgaarsiinta iyo Korontada Qaranka

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo Hay'adda Korontada Qaranka ayaa maanta yeeshey kulankoodii ugu horreeyay ee aqoon-isweydaarsi ah kaas oo ka dhacay xarunta dhexe ee HIQ

Kulankan ayaa ahaa madal muhiim ah oo ay labada hay'adood ku wadaageen khibrado iyo macluumaad la xiriira hawlaha rukhsad bixinta iyo maamulka, iyada oo ujeeddadu tahay in la xoojiyo iskaashiga iyo wada-shaqeynta labada hay'adood.

Aqoon-isweydaarsigan, oo ay goobjoog ka ahaayeen maareeyayaasha, ku-xigeennada, iyo qaar ka mid ah madax-qeybeedyada iyo la-taliyayaasha labada hay'ad, ayaa lagu gorfeynayay sidii loo horumarin lahaa adeegyada teknolojiyada iyo korontada dalka. Labada hay'adood ayaa isla gartay in wada-shaqeynta joogtada ah iyo is-dhaafsiga khibradaha ay yihiin tiirarka muhiimka ah ee gaaridda yoolalka horumarineed ee Qaranka.



Maareeyaha HIQ oo Soo Xirey Shirka Xirfadleyda Teknolojiyada

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa si rasmi ah u soo xirey Shirka Xirfadleyda Teknolojiyada (Somalia Network Operators Group – SomNOG7), kaasoo lagu qabtay Muqdisho.

Shirkan oo ah mid sanadle ah ayaa isku keena xirfadleyda ku xeel dheer arrimaha isgaarsiinta, internetka, shirkadaha ka ganacsada adeegyada internetka, bahda waxbarashada, iyo dadka daneeya horumarinta internet-ka Soomaaliya. Mowduuca shirka sanadkan ayaa ahaa “Kaabayaasha Dhijitaalka ah ee Dadweynaha: Aasaaska Mustaqbalka Dhijitaalka ah ee Soomaaliya.” Shirkan ayaa lagu falanqeyyay dhismaha kaabayaasha dhijitaalka ah ee muhiimka u ah mustaqbalka teknolojiyada Soomaaliya, iyadoo laga dooday sidii loo hormarin lahaa adeegyada dhijitaalka ah ee dalka.

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Md. Mustafa Yaasiin Sheekh, oo shirka soo xirey, ayaa khudbaddiisa ku sheegay muhiimadda ay leedahay in si wadajir ah looga shaqeyo horumarinta kaabayaasha dhijitaalka ah. Wuxuu amaanay bahda Shirka Xirfadleyda Teknolojiyada iyo shirkadaha taageeray shirka, isagoo xusay in wada-shaqeyntooda ay fure u tahay in Soomaaliya ay yeelato mustaqbal dhijitaal oo ifaya.





Shirweynaha 29aad ee Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika (EACO)

Maareeyaha Guud ee HIQ, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa ka qeybgalay Shirweynaha 29aad ee Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika (EACO), oo lagu qabtay magaalada Nayroobi.

Shirkan ayaa sanadkan xoogga lagu saaray dhiirigelinta isbeddelka dhijitaalka ee gobolka Bariga Afrika, iyadoo la sahamiyay fursado wadajir ah oo kor u qaadi kara kobaca dhaqaalaha ee gobolka.

Ka qeybgalka Soomaaliya ee shirkan ayaa muujinaya sida ay uga go'an tahay dowladda Soomaaliya in ay kaalin firfircoon ka qaadato horumarinta isgaarsiinta iyo teknolojiyada Bariga Afrika, taas oo horseedi karta helidda fursado horumarineed oo dhinaca isgaarsiinta ah.

Intii uu shirku socday, wafdigu wuxuu kulamo doceedyo la yeeshay qaar kamid ah madaxda hay'adaha

isgaarsiinta ee Bariga Afrika. Kulamadan ayaa diiradda lagu saaray iskaashiga dhinaca isgaarsiinta iyo teknolojiyada, iyadoo laga wada hadlay fursadaha iskaashiga iyo horumarinta adeegyada isgaarsiinta ee ka jira gobolka.

Wafdiga ayaa kulan gaar ah la qaatay Mudane William Baraza, Agaasimaha Machadka AFRALTI, iyaga oo ka wada hadlay suurtagalnimada xubinnimada Soomaaliya ee machadka iyo fursadaha iskaashi ee ku saabsan dhismaha awoodda xirfadeed iyo cilmi-baarista.

Sidoo kale wafdiga ayaa kulan muhiim ah la yeeshay Xoghayaha Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika, Dr. Ally Yahaya Simba, iyagoo isla falanqeyay iskaashiga mustaqbalka iyo kaalinta Soomaaliya ee Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika.



Mashruuca Isku-xirka Dhijitaalka ee Bariga Afrika

Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Xildhibaan Maxamed Aadan Macallin Cali (Soomaali), ayaa daah furay Shirka Xoojinta Mashruuca Isku-xirka Dhijitaalka ee Bariga Afrika (EARDIP) oo ka dhacay magaalada Nayroobi.

Wasiirka oo hadalka ka jeediyay goobta ayaa xusay muhiimadda mashruucan EARDIP uu u leeyahay isku-xirka dalalka Bariga Afrika. Wasiirku waxa uu carabka ku adkeeyay sida mashruucani u fududeyn doono in xogaha ganacsiga iyo isgaarsiinta si hufan uga gudbaan xuduudaha, taas oo fursad weyn u ah kor u qaadista dhaqaalaha iyo horumarinta ganacsiga Soomaaliya.

Maareeye ku-xigeenka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Axmed Cali Salaad, iyo La-taliyaal ka tirsan hay'adda HIQ ayaa iyaguna si rasmi ah uga qeybgalay shirka, waxayna kulanka ku biiriyeen afkaar iyo aragtiyo wax ku-ool ah, iyadoo tilmaamay mashruucan ay ka wada faa'iideysan doonaan dhammaan waddamada Bariga Afrika.

Shirkan oo socday muddo afar maalmood ah ayaa waxaa si wadajir ah u soo qabanqaabiyay Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada iyo Bangiga Adduunka, iyadoo looga gol lahaa xoojinta iskaashiga isgaarsiinta, horumarinta ganacsiga, iyo isdhexgalka dhaqaale ee dalalka ku yaalla Bariga Afrika.

Madaxa Bangiga Adduunka ee Soomaaliya, Marwo Kristina Svensson, ayaa shirkan ku bogaadisay heerka uu mashruucani soo gaaray, iyadoo sheegtay in dadaallada wadajirka ah ay gacan weyn ka geysan doonaan horumarinta dhijitaalka ee dalalka Bariga Afrika.

Mashruucan EARDIP oo uu maalgeiyay Bangiga Adduunka, ujeedkiisu waa sidii loo ballaarin lahaa baahinta internetka iyo horumarinta isgaarsiinta casriga ah, taas oo si weyn u kobcin doona dhaqaalaha iyo adeegyada bulshada ee dalkaas.



Teknolojiyada Maaliyadeed

Hordhac

Teknolojiyada Maaliyadeed (Fintech) waxay noqotay awood beddelaysa dhaqaalaha caalamka, iyadoo dib u qaabaysa habka shaqsiyaadka, ganacsiyada, iyo dowladaha ula macaamilaan adeegyada maaliyadeed. Laga bilaabo bankiyada internetka ilaa lacagaha dhijitaalka ah ee ku saleysan blockchain, Teknolojiyada Maaliyadeed waxay horumarisay hal-abuurnimada dhammaan qaybaha maaliyadda. Haddaba, qoraalkaan wuxuu ka hadlayaa waxa Teknolojiyada Maaliyadeed ay tahay, ujeeddadiisa, faa'iidooyinka muhiimka ah, iyo caqabadaha uu la kulmo markuu sii kobco.

Taariikhada Teknolojiyada Maaliyadeed Oo Kooban

1.0 Teknolojiyada Maaliyadeed (1960-1988)	1967	Bankiga Barclays ayaa soo saaray aaladdii ugu horreyay dunida ee lacag bixin oo (ATM) lagala baxo.
	1980	Wall Street ayaa bilaabay adeegsiga ereyga 'fintech'
	1983	HomeLink, ayaa hirgalsay foomkii ugu horeeyay ee hab online ah lagu buuxiyo, waxaana hirgelsay bulshada reer Nottingham oo taageero ka helaya Bankiga Scotland.
2.0 Teknolojiyada Maaliyadeed (1988-2008)	1989	Bankigii ugu horreeyay ee toos ah (oo aan lahayn laamo), oo loo yaqaan First Direct Bank ayaa laga furay UK, waxaana hirgeliyay Bankiga Midland.
	1995	Bankigii ugu horreeyay ee online- ah, oo loo yaqaan Security First Network Bank (SFNB), ayaa laga furay Mareykanka.
	1999	PayPal ayaa noqotay shirkaddii ugu horreysay ee caalami ah ee hab dhigitaal ah lacag ku bixisa.
	2005	Shirkadda Zopa, oo xarunteeda tahay dalka UK, ayaa daahfurtay lacag kala amaahasho shaqsi ah (Peer to peer).
3.0 Teknolojiyada Maaliyadeed (2009 ilaa iyo hadda)	2009	Satoshi Nakamoto ayaa hindisay bitcoin, iyo nidaamka casriga ah ee lagu isticmaalayo. Sidoo kale, madasha lacag uruurita dadweyhana (Crowdfunding) ayaa la bilaabay.
	2015	Hay'adda Nidaamyada Lacag-bixinta ee Boqortooyada Midowday ayaa la aasaasay, UK Payment Systems Regulator (PSR).
	2016	Hay'adda Maamulka Maaliyadda "Financial Conduct Authority's (FCA)" ayaa aasaastay sanduuqa tijaabada fikradaha hal-abuurka ah "Regulatory Sandbox" iyagoo adeegsanaya macaamiil dhab ah.
	2017	Tirada lacag-bixinnada kaararka debit-ka ee UK ayaa markii ugu horreysay dhaaftay tirada lacag-bixinnada lacagta caddaanka ah.
	2018	Waxaa la daahfuray nidaamka furan ee Bangkiyada UK iyo hirgelinta Habraaca Labaad ee Adeegyada Lacag-bixinta ee Midowga Yurub (Payment Services Directive PSD2), taas oo ujeedkeedu yahay in la dhiirrigeliyo tartanka iyo hal-abuurka ee adeegyada maaliyadeed.
	2018	Dawladda UK ayaa ku dhawaaqday abuurista 'Kooxda Hawlgalka ee Cryptoassets,' UK Cryptoassets Taskforce' taas oo loo aasaasay si loo fahmo, loona maareeyo, loona kormeero saamaynta ay cryptoassets ku leeyihiin dhaqaalaha dalka.
	2019	Facebook ayaa daabacday qorshaheeda ay ku sameyneyso lacagta dhijitalka ah ee loo yaqaano Libra
	2021	Waxaa la daabacay Dib-u-eegista Kalifa ee Fintech-ka UK ayaa bixisay talooyin muhiim ah oo lagu taageerayo kobaca iyo horumarinta qaybta fintech-ka ee UK.
	2021	Waaxda Maaliyadda UK (HM Treasury) iyo Bankiga Ingiriiska ayaa sameeyay Kooxda Hawlgalka ee Lacagta Dhijitalka ah ee Bankiga Dhexe (Central Bank Digital Currency (CBDC) Taskforce) si ay u baaraan horumarinta suurtagalka ah ee CBDC ee UK.

Ujeeddada Teknolojiyada Maaliyadeed

Ujeeddada ugu weyn ee Teknolojiyada Maaliyadeed waa in la hagaajiyo adeegyada maaliyadeed iyadoo laga dhigayo kuwo hufan, la heli karo, oo ammaan ah.

Ujeedooyinkeeda waaweyn waxaa ka mid ah:

1. Inay kordhiso Helitaanka Adeegyada:

Teknolojiyada Maaliyadeed waxay awood u siinaysaa dadka aan horey u heli jirin adeegyada maaliyadeed inay ka faa'iidaystaan, sida dadka aan banki lahayn ama aan si fudud u heli karin adeegyada maaliyadeed. Bankiyada moobaylka

iyo boorsooyinka dhijitaalka ah, tusaale ahaan, waxay dadka u oggolaanayaan inay lacag dhigtaan soo wareejiyaan iyagoo aan banki toos ah lahayn.

2. Inay Kordhiso Wax-soosaarka iyo Hufnaanta:

Teknolojiyada Maaliyadeed waxay casriyeesay nidaamyada lacag-bixinta, amaahda, iyo sheegashada caymiska, taasoo ka dhigaysa hawlaha maaliyadeed kuwo dhaqsiyo leh, isla markaana yareyneysa waqtiga iyo kharashaadka macaamiisha.

3. Dhiirrigelinta Hal-abuurnimada:

Teknolojiyada Maaliyadeed waxay dhiirrigelisaa horumarinta adeegyada maaliyadeed ee dhijitaalka ah. Hal-abuurnimadan waxay shaki galisaa nidaamyadii hore ee bankiyada, taasoo ku qasbeysa bankiyada inay iswaafajiyaan baahida is beddelaysa ee adeegyada macaamiishooda.

4. Horumarinta Nidaam Maaliyadeed loo dhan yahay:

Iyadoo la dhimayo kharashaadka sidoo kalena la abuurayo aalado dhaqaale oo kala duwan, Teknolojiyada Maaliyadeed waxay awood u siinaysaa shakhsiyaadka iyo ganacsiyada yar-yar inay ka qaybqaataan nidaamka dhaqaalaha, taasoo kor u qaadaysa kobaca dhaqaalaha iyo ka-qaybgalka bulshooyinka oo dhan.

Faa'iidooyinka Teknolojiyada Maaliyadda

Faa'iidooyinka Teknolojiyada Maaliyadeed waxaa ka mid ah:

1. Helitaanka Adeegyada: Madalaha dhijitaalka ah ayaa u oggolaanaya macmiisha inay ku maareeyaan dhaqaalahooda meel kasta iyo waqti kasta ay joogaan. App-yada moobaylka ee bangiyada, maalgashiga, iyo wareejinta lacagaha ayaa ka dhigay maaraynta dhaqaalaha shaqsiga iyo ganacsiga mid aad u sahlan.

2. Hufnaanta Qiimaha: Xalka Teknolojiyada Maaliyadeed waa kuwo jaban marka loo eego adeegyada bankiyada ee hore. Sidoo kale, barnaamijyada amaahda ee shaqsiga ah waxay fududeysay lacag helidda ganacsiyada yar yar iyo shaqsiyaadka.

3. Khibradda Macaamiisha oo la Hagaajiyay: iyadoo la adeegsanayo (AI), shirkadaha Teknolojiyada Maaliyadda waxay bixiyaan talo maaliyadeed ku saleysan baahida shaqsiga iyo adeegga macaamiisha oo casriyeysan, taasoo sare u qaadaysa qanacsanaanta macaamiisha.

4. Wareejinta Degdegga ah ee Lacagaha: Teknolojiyada blockchain iyo nidaamyada lacag-bixinta dhijitaalka ah waxay fududeeyeen wareejinta lacagaha si degdeg ah, taas oo yaraysay khidmada lacag dirista, iyo waqtiga sugitaanka ee caadi ahaan lagala kulmi jiray nidaamyadii hore ee bangiyada.

5. Aqoon Ku Salaysan Xogta: Iyada oo la adeegsanayo AI, shirkadaha Teknolojiyada Maaliyadeed waxay falanqeyn karaan xogta macmiisha si ay u bixiyaan talooyin dhaqaale oo gaar ah, taasoo wanaajineysa go'aan-qaadashada macaamiisha iyo ganacsiyada.

6. Amniga: Teknolojiyada Maaliyadeed waxay adeegsadaan teknolojiyad sir sare leh iyo blockchain si ay u abuuraan hab lacag-bixin oo ammaan ah. Shirkadaha Teknolojiyada Maaliyadeed waxay si joogto ah u horumarinayaan habab cusub oo lagu ilaaliyo xogta macaamiisha loogana hortagayo wax is dabamarinta.

Caqabadaha Teknolojiyada Maaliyadeed

In kasta oo Teknolojiyada Maaliyadeed ay leedahay faa'iidooyin badan, haddana waxaa jira caqabado fara badan oo laga yaabo inay hor istaagaan kobaca iyo qaadashada adeegyada casriga ah.

Waxaa caqabadaha ka mid ah:

1. Hubanti la'aanta Xeer-nidaaminta Teknolojiyada Maaliyadeed:

Shirkadaha Teknolojiyada Maaliyadeed waxay ku shaqeeyaan xeerar adag oo isbed-beddela. Dowladaha iyo hay'adaha xeer-dejinta weli ma lahan hab ku filan oo ay ula socdaan isbeddellada teknolojiyada oo degdeg ah, taas oo horseedi karta hubanti la'aan shirkadaha teknolojiyada Maaliyadeed.

Gobollada kala duwan waxay leeyihiin xeerar kala duwan, taas oo ka dhigaysa mid adag in la helo shuruuc heer calami ah.

2. Walbahaarka Amniga: In kasta oo hal-abuurnimada Teknolojiyada Maaliyadeed ay keentay tallaabooyin amni oo horumarsan, haddana kororka weerarrada internetka iyo jabsiga xogta waa arrin weyn. Xogta maaliyadeed aad ayeysa xasaasi u tahay, halmar oo la jabsado xogtaas waxay si weyn u waxyeelayn kartaa kalsoonida macaamiisha ee adeegyada Teknolojiyada Maaliyadeed.

3. Kalsoonida Macaamiisha: Macaamiil badan weli waxay ka shaki qabaan adeegyada maaliyadeed ee dhijitaalka ah. Kalsoonidu waa arrin muhiim ah oo ku jirta adeegyada maaliyadeed, shirkadaha Teknolojiyada Maaliyadeed waa inay si joogto ah uga shaqeeyaan sidii ay u heli lahaayeen una ilaalin lahaayeen kalsoonida isticmaaleyaasha, gaar ahaan marka laga hadlayo arrimaha qarsoodiga iyo amniga xogta.

4. Aqoonta Maaliyadeed: Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee ku hor gudban qaadashada xalalka Teknolojiyada Maaliyadeed, gaar ahaan waddamada soo koraya, waa yaraanta aqoonta maaliyadeed. Iyadoo aan laheyn faham aasaasi ah oo ku saabsan sida tegnoolajiyadahaan u shaqeeyaan, dad badan ayaa laga yaabaa inay ku adag tahay inay aaminaan ama isticmaalaan adeegyada Teknolojiyada Maaliyadeed.

5. Tartanka Hay'adaha Maaliyadeedkii hore u jiray:

In kasta oo shirkadaha Teknolojiyada Maaliyadeed ay yihiin kuwo hufan oo hal-abuurnimo leh, haddana waxay la kulmaan tartan adag oo ka yimaada Bankiyada maaliyadeed ee isticmaalaya hababkii hore kuwaas oo heysta agabyo badan, aqoonsi ganacsi oo xooggan, iyo macaamiil muddo dheer soo jiray. Bankiyadii hore qaarkood waxay iibsadeen shirkadaha soo koraya ee Teknolojiyada Maaliyadeed iyaga si weyn ugu maalgashaday horumarintooda isbeddelka dhanka dhijitaalka ah.

6. Isku-xirka Nidaamyada Hore:

Ganacsiyo badan iyo Bankiyada maaliyadeed waxay weli ku tiirsan yihiin nidaamyadii hore ee duugoobay. Ku dhex-darka xalalka cusub ee Teknolojiyada Maaliyadeed nidaamyadaas hore waa mid adag oo qaali ah, taas oo laga yaabo inay dib u dhigto qaadashada hal-abuurka Teknolojiyada Maaliyadeed ee Bankiyada isticmaalya nidaamyadii hore ee duugoobay.

GUNAANAD

Teknolojiyada Maaliyadeed waa teknolojiyad beddelaysa qeybaha maaliyadeed, iyadoo bixineysa xalal hal-abuurnimo leh oo ka dhigaya adeegyada maaliyadeed kuwo si fudud loo heli karo, hufan, oo ammaan ah. Soo ifbaxiddeeda waxay horseedday horumar ballaaran oo ku saabsan Nidaamka Maaliyadeed ee loo dhanyahay, khibradda macaamiisha, iyo hufnaanta shaqo. Si kastaba ha ahaatee, suuqa teknolojiyada maaliyadeed waxay wajahayaan caqabado badan, laga bilaabo hubanti la'aanta xeer-nidaamintooda ilaa walwalka amniga iyo tartanka ka socda Bangiyada isticmaala nidaamkii hore.

Haddaba kobaca Teknolojiyada Maaliyadeed, waxaa muhiim ah in daneeyayaasha - oo ay ka mid yihiin shirkadaha yar-yar, bangiyada, iyo kuwa xeer-dejiyayaasha - ay si wadajir ah uga shaqeeyaan sidii ay caqabadahaas u xalin lahaayeen oo ay u kordhin lahaayeen awoodda teknolojiyada maaliyadeed si ay u qaabeeyaan mustaqbalka maaliyadda caalamka.

WQ: Cabdicasiis M. Cabdi

Munaasabado kala duwan

Maareeyaha Guud ee HIQ Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh
ayaa ka qeybgalay munaasado
kala duwan oo muhiim ah:-

Shirka Garaadka Macmalka (AI Summit Somalia)



Mudane Mustafa Yaasin Sheekh, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa ka qaybgalay Shirka Garaadka Macmalka (AI) ee Soomaaliya.

Intii uu shirku socday, wuxuu ka hadlay muhiimadda Garaadka Macmalka ah (AI) ee Soomaaliya, isaga oo carabka ku adkeeyey in AI-du loo isticmaali karo sidii lagu horumarin lahaa hal-abuurka, kor loogu qaadi lahaa maamul-wanaagga, lana furi lahaa fursado dhaqaale. Waxa uu ku nuux-nuuxsaday muhiimadda horumarinta adeegyada AI-da oo ku saleysan anshax iyo mas'uuliyad, si loo hubiyo in ay bulshada u adeegaan si waxtar leh oo loo wada dhan yahay.



Madasha Caafimaadka Dhijitaaljka ee Soomaaliya (e-Health Somalia)



Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa ka hadlay Shirweynaha Caafimaadka Dhijitaaljka ee Soomaaliya 2024.

Wuxuu ku tilmaamay in caafimaadka dhijitaaljka uu muhiim u yahay helitaanka adeegyo caafimaad oo dhakhso leh, hufan, oo ay heli karaan dhammaan dadka bulshada. Maareeyaha ayaa tilmaamay doorka istaraatiijiyadaha isgaarsiinta ee aasaaska u ah guusha dadaallada lagu horumarinayo caafimaadka dhijitaaljka.



Mashruuca Bile



Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh ayaa ka qeybgalay xiritaanka tababar laba toddobaad ah oo uu qeyb ka ahaa Mashruuca Bile. Barnaamijkan oo ay si wadajir ah u soo qabanqaabiyeen Shabakadda Somali Research & Education Network, Tabarak ICT, iyo Hormuud Salaam Foundation ayaa lagu taageerayay dhallinyarada Soomaaliyeed. Hadafka mashruuca ayaa waxaa ka mid ahaa sidii loo diyaarin ahaa aqoonyahno dhinaca teknolojiyada ah.



Maareeyaha ayaa ku ammaanay mashruuca doorka uu ka qaadanayo sidii dhallinyarada loogu qalabeyn lahaa xirfado muhiim ah oo sare u qaadaya kobaca dhaqaale iyo horumarinta shirkadaha gudaha iyo guud ahaan horumarka dalka.

Shirweynaha U Adkeysiga Aafooyinka ee Soomaaliya



Maareeyaha Guud ee HIQ, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa ka mid ahaa marti sharaftii lagu casumay Shirweynaha U Adkeysiga Aafooyinka ee Soomaaliya ee 6-7dii Nofeembar, 2024 lagu qabtay magaalada Muqdisho.



Maareeyaha Guud ayaa ka-qaybgalayaasha doodda fadhiga koowaad ee Shirweynaha U Adkeysiga Aafooyinka ee Soomaaliya. Dooddan ayaa looga hadlay sidii loo kobcin lahaa awoodaha u adkeysiga aafooyinka iyada oo la adeegsanayo waxbarashada, teknolojiyada, iyo ka qeybgalka bulshada.

Maareeyaha ayaa inta fadhi-doodku uu socday tilmaamay muhiimada iskaashiga iyo wadajirka si loo xoojiyo horumarka kaabayaasha dhaqaalaha dalka, loogana hortago aafooyinka soo noqnoqda.

Madax Qeybeedyada Hay'adda oo Kulamo iyo Seminaaro Dibadda ah ka qeybgalay

Nairobi, Kenya – Madaxa Waaxda Rukhsadaha iyo Korjoogteynta ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), Liibaan Cabdiqaadir Sheekh Qaasim, iyo Madaxa Maamulka iyo Maaliyadda Cabdicasiis Maxamed Cabdi, ayaa ka qeybgalay tababar caalami ah oo ku saabsan Iskaashiga Dowladda iyo Ganacsatada (Public Private Partnership - PPP). Tababarka oo lagu qabtay 18–24 Febraayo, 2024, ayaa waxaa soo qabanqaabisay Hay'adda Maaliyadda Caalamiga ah (IFC) ee hoos tagta Bankiga Adduunka (World Bank).



Barnaamijkan, oo ah mid heer caalami ah, ayaa loogu talagalay in lagu horumariyo aqoonta iyo waayo-aragnimada ka qeybgalayaasha si ay ugu guuleystaan shahaadada caalamiga ah ee APMG PPP (CP3P). Tababarka ayaa wuxuu diiradda saaray kor u qaadista iskaashiga maalgashiga dowladaha iyo ganacsatada, iyadoo sidoo kale la wadaagay hababka caalamiga ah ee ku saabsan maalgelinta mashaariicda muhiimka ah.

Dubai, UAE– Madaxa Waaxda Amniga Internetka, Maxamed Xaaji Cabdulqaadir Cabdi, iyo Madaxa Waaxda Rukhsadaha iyo Korjoogteynta Liibaan Cabdiqaadir Sheekh Qaasim, ayaa ka qaybgalay Bandhigga Amniga Internetka iyo Shirka Sanadlaha ah ee Amniga Macluumaadka ee Gacanka (Gulf Information Security Expo & Conference - GISEC) iyo ITU CyberDrill 2024, oo lagu qabtay magaalada Dubai, ee Isutagga Imaaraadka Carabta, intii u dhaxaysay 23–25 Abriil, 2024.



Bandhigga iyo shirka ayaa waxaa ka soo qaybgalay aqoonyahanno iyo khubaro ka kala socda in ka badan 120 waddan iyo hay'ado caalami ah oo ay ka mid yihiin Qaramada Midoobay (UN) iyo INTERPOL. Sidoo kale, shirkadaha ugu waaweyn ee ku takhasusay teknoloojiyada iyo amniga internetka sida Kaspersky, Google, iyo Microsoft ayaa soo bandhigay teknoloojiyado cusub oo kor loogu qaadayo amniga internetka ee dowladaha iyo shirkadaha.

Waxaa kale oo la soo bandhigay qalab casri ah oo loogu talagalay in lagu hortago khataraha iyo dhibaatooyinka burcadda internetka, gaar ahaan weerarrada nooca ransomware.

Bandhigga Amniga Internetka (GISEC) wuxuu laf-dhabar u yahay isku-xirka iyo wada-shaqeynta hay'adaha dowliga ah, bangiyada, iyo shirkadaha soo saara teknoloojiyada iyo qalabka amniga internetka. Gaar ahaan, waxaa xoogga lagu saaray sidii loo horumarin lahaa iskaashiga caalamiga ah ee ka hortagga burcadda internetka iyo sidii wax looga qaban lahaa caqabadaha sii kordhaya ee la xiriira amniga internetka.



Windhoek, Namibia – Dr. Khaalid C/llaahi Cali, Madaxa Waaxda Injineerinka ee HIQ, ayaa ka qeybgalay tababarka PRIDA ee ku saabsan qiimaynta hirarka iyo injineerinka hirarka (Spectrum pricing, spectrum engineering), kaas oo lagu qabtay magaalada Windhoek, caasimadda dalka Namibia, 2-5 April 2024.

Tababarkan, oo ay ka soo qayb galeen daneeyayaasha gaarka ah, mas'uuliyiin dowladeed, hay'ado sharciyeed, iyo khubarada isgaarsiinta, ayaa looga hadlay caqabadaha

ku saabsan maaraynta iyo qiimaynta hirarka isgaarsiinta. Intii uu socday tababarku, waxaa hoosta laga xariiqay muhiimadda maaraynta hufan ee hirarka iyo horumarinta joogtada ah ee teknoolojiyada isgaarsiinta. Ka-qeybgalka tababarkan ayaa muujinaya sida Hay'addu uga go'an tahay xaqiijinta horumarka isgaarsiinta Soomaaliya.



Baqdaad, Ciraaq, Eng. Naciima Xasan Dhimbil, Madaxa Waaxda Isku-xirka, Qiimaha, iyo Adeegga Baahsan ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, ayaa ka qayb gashay dabaaldegga sanadlaha ah ee Maalinta Caalamiga ah ee Gabdhaha ee ICT-da, oo lagu qabtay magaalada Baqdaad, Ciraaq, 12-13ka May 2024.

Eng. Naciima Xasan Dhimbil ayaa matalaysay Shabakadda Haweenka ee Gobolka Carabta, oo ah hindise lagu dhiirrigelinayo ka qaybgalka firfircoon ee haweenka ee hawlaha ITU iyo guud ahaan qeybta isgaarsiinta. Hindisahan ayaa diiradda saaray kor u qaadista doorka haweenka iyo diyaarintooda si ay u qabtaan xilal hoggaamineed oo muhiim ah oo ay kaga dhex muuqdaan wufuudda dalalkooda ee ka qeybgala shirarka caalamiga ah ee ITU.

Intii ay munaasabadda socotay, Eng. Naciima ayaa ka qayb gashay dood-wadaag cinwaankeedu ahaa "Isticmaalka ICT-da si kor loogu daadayay aqoonta hoggaaminta ee Gobolka Carabta", waxayna sidoo kale kulammo heer sare ah la yeelatay Marwada Koowaad ee Ciraaq iyo mas'uuliyiin sare oo ka tirsan Hay'adda Isgaarsiinta iyo Warbaahinta Ciraaq (CMC).



Nairobi, Kenya – Maxamed Cali Sheekh Maxamuud, oo ah Madaxa Xarunta Maamulka Furaha Internet-ka Qaranka (SONIC), ayaa ka qeybgalay tababar ballaaran oo ku saabsan isbeddelka dhijitaalka ee qaybta guud.

Tababarkan ayaa diiradda lagu saaray fahamka aragtida, faa'iidooyinka, iyo caqabadaha la xiriira isbeddelka dhijitaalka, iyadoo xoogga la saaray sida adeegyada dadweynaha loogu qaabeeyo hab ku saleysan baahida bulshada (citizen-centric).

Mawduucyada tababarka lagu qaabeeyay ayaa waxaa ka mid ahaa dejinta istiraatiijiyad dhijitaal ah, maaraynta xogta, abuuridda dhaqan dhijitaal, iyo ka gudubka caqabadaha iska-caabbinta isbeddelka. Waxa sidoo kale si gaar ah loo falanqeyay adeegsiga teknoolojiyada casriga ah sida Garaadka Macmalka (AI), Blockchain, iyo Cloud Computing si loo wanaajiyo adeegyada dadweynaha.

Maxamed waxa uu qaatay xirfado la xiriira maaraynta mashaariicda isbeddelka, sida Agile iyo Prince2, iyo muhiimada tijaabinta mashruuca kahor hirgelintiisa. Tababarka ayaa sidoo kale xoojiyay fahamka la xiriira asturnaanta iyo ilaalinta xogta dadweynaha, iyadoo laga faa'iidaystay daraasado guuleystay oo laga soo bandhigay dalalka Estonia, UK, iyo Kenya. Tababarkani waxa uu u suurageliyay Maxamed inuu yeesho aragti cad oo ku saabsan sida Soomaaliya uga faa'iideysan karto hababka ugu wanaagsan ee isbeddelka dhijitaalka si loo horumariyo adeegyada dadweynaha.



Qaar ka mid Shaqaalaha Hay'adda oo tababaro Dibadda ah ka qeybgalay

Mohali, India – Cabdullaahi Maxamuud Eybakar, Maamulaha Nidaamka Shabakadaha ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, ayaa ka qeybgalay tababar afar toddobaad socday oo ku saabsanaa Sayniska Xogta iyo Falanqaynta (Data Science and Analytics), kaas oo lagu qabtay magaalada Mohali, Hindiya.

Intii uu tababarka ku guda jiray, Cabdullaahi wuxuu bartay xirfado muhiim ah oo ay ka mid yihiin barnaamijyada Python, maareynta xogta, falanqaynta tirakoobka, iyo barashada mashiinka (Machine Learning).

Sidoo kale, wuxuu ka qeybgalay booqashooyin dhaqameed oo xiiso leh, sida booqashada Taj Mahal, Golden Temple, iyo xadka Wagah.



Muscat, Oman – Eng. Jaamac Cabdi Xuseen, Madaxa Hubinta Qalabka (Type Approval) ee HIQ, ayaa ka qeybgalay aqoon-is-weydaarsi ku saabsan Iswaafajinta Korontada Birlabka (Electromagnetic-ga), kaas oo lagu qabtay dalka Cumaan, ayna soo qabanqaabisay Hay'adda Nidaaminta Isgaarsiinta ee Cumaan (TRA), iyadoo kaashanaysa ITU.

Aqoon-isweydaarsiga oo socday 4 cisho ayaa diiradda lagu saaray sidii kor loogu qaadi lahaa wacyiga dadweynaha ee ku aaddan saameynta Korontada Birlabka ee caafimaadka bulshada, iyadoo la raacayo halbeegyada caalamiga ah. Maalinta labaad ee aqoon-is-weydaarsiga, dowladaha Soomaaliya, Kuweyt, Urdun, Masar, iyo Suudaan ayaa soo bandhigay hababka wacyigelineed ee bulshada, iyadoo ku taliyay in siminaaro iyo tababaro lagu qabto iskuullada, jaamacadaha, iyo xarumaha bulshada si loo kordhiyo wacyiga dadweynaha.



Noida, India – Cabdicasiis Maxamed Cabdullaahi, oo ka tirsan Waaxda Injineerinka ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), ayaa ka qeybgalay Barnaamijka Tababarka Caalamiga ah ee Nidaamyada Maamulka, oo lagu qabtay magaalada Noida, Hindiya, bishii Luulyo 2024. Tababarkan ayaa lagu bartay aqoon iyo xirfado ku saabsan nidaamyada maamulka casriga ah iyo heerarka caalamiga ah.

Tababarkan ayaa si gaar ah diiradda u saaray mowduuco muhiim ah, sida maaraynta tayada, ilaalinta deegaanka, caafimaadka iyo badbaadada shaqaalaha, iyo amniga cuntada. Intaa waxaa dheer, ka-qaybgalayaashu waxay bardeen farsamooyin wax-ku-ool ah oo lagu hirgeliyo, lagu kormeero, islamarkaana lagu qiimeeyo nidaamyada maamulka si loo hagaajiyo waxqabadka loona kordhiyo hufnaanta shaqada.



Marrakesh, Morocco -

Cabdiraxmaan Cali Hirad, oo ka tirsan Waaxda Amniga Internet-ka ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), ayaa ka qaybgalay Layliga Diyaargarowga Amniga Internet-ka ee Gobolka, GITEX AFRICA 2024, oo ay soo qabanqaabiyeen Midowga Isgaarsiinta Caalamiga (ITU) iyo GITEX Africa, laguna qabtay magaalada Maraakesh ee dalka Marooko, intii u dhaxaysay 29-31 May 2024.



Layligan ayaa diiradda lagu saaray diyaarinta qorshayaal lagu xoojiyo amniga internet-ka, ka hortagga xadgudubada amniga internet-ka, iyo sidii iskaashi looga sameyn lahaa wax ka qabashada khataraha soo wajaha dalalka Afrika iyo Carabta.

Ahmedabad, India- Shukri Xaraare Cali, oo ka tirsan Waaxda Isku-xirka, Qiimaha, iyo Adeegga Baahsan ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), ayaa ka qeybgashay tababar cinwaankiisu ahaa “Awoodsiinta Haweenka iyada oo loo Marayo Horumarinta Ganacsiga”, kaas oo lagu qabtay magaalada Ahmedabad, Hindiya, intii u dhaxaysay 1-da ilaa 14-ka September 2024.



Tababarkan ayaa lagu baranayay sidii haweenka loogu fududeyn lahaa inay ka gudbaan caqabadaha dhaqan-dhaqaale ee ku xeeran, iyada oo la barayo xirfado muhiim ah oo ku saabsan qorsheynta ganacsiga, maaraynta maaliyadda, iyo suuq-geynta. Sidoo kale, waxaa tababarka ku jiray mowduucyo muhiim ah sida hal-abuurka, xuquuqda hantida maskaxda, iyo ka hortagga walbahaarka, si loo xoojiyo isku dheelitirka nololsha shaqada iyo midda gaarka ah.

Muscat, Oman - Ifraax Yuusuf Warsame, oo ka tirsan Waaxda Amniga Internet-ka ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), ayaa ka qeybgashay Todobaadka 12-aad ee Amniga Internet-ka ee Gobolka Carabta, kaas oo lagu qabtay magaalada Muscat, Cumaan, intii u dhaxaysay 28-31 October 2024.



Shirkan, oo ay martigelisay Wasaaradda Gaadiidka, Isgaarsiinta, iyo Teknolojiyada Macluumaadka ee Cumaan, ayaa waxaa soo qabanqaabiyay Xarunta Goboleedka Amniga Internet-ka ee ITU.

Shirkan, oo ay ka soo qaybgaleen in ka badan 600 qof oo ka kala socday 60 waddan, ayaa diiradda saaray hal-ku-dhegga ah: “Amniga Internet-ka oo Kordhiya Kobaca Dhaqaale”, iyadoo lagu falanqeyay hanjabaadaha cusub ee internet-ka, istaraatiijiyadaha horumarinta, iyo sida amniga internet-ka loogu adeegsan karo kobcinta dhaqaalaha dhijitaalka ah.

Qeybaha muhiimka ah ee shirkan ayaa waxaa ka mid ahaa dooddo ku saabsan ammaanka dhijitaalka ah, horumarka teknolojiyada ee difaaca internet-ka, iyo tababaro gaar ah oo la xiriira halista amniga internet-ka ee saameeya dhaqaalaha. Tababarka loo sameeyay ka qaybgalayaasha ayaa ahaa mid lagu dhiirrigeliyay in la barto farsamooyin cusub oo wax-ku-ool ah, sida Velociraptor, Arkime, iyo Kali Linux, kuwaas oo loo adeegsan karo maaraynta iyo ka jawaabidda hanjabaadaha dhijitaalka.

Qaar ka mid Shaqaalaha Hay'adda oo tababaro Dibadda ah ka qeybgalay

Brazzaville, Congo – C/raxiin Yuusuf Maxamed, oo ka tirsan Waaxda Injineerinka ee HIQ, ayaa ka qeybgalay tababar ku saabsan Maqalka iyo Muuqbaahiyaha Dhijitaalka ah (Digital Terrestrial Television) iyo Maamulka Hirarka, kaas oo lagu qabtay magaalada Brazzaville, caasimadda dalka Congo, intii u dhaxaysay 14-15 April 2024.



Ka qaybgalayaasha ayaa tababarkan lagu barayay sidii kor loogu qaadi lahaa aqoonta la xiriirta maamulka hirarka iyo qaab-dhismeedka sharciyeed ee baahinta dhijitaalka ah. Sidoo kale, waxaa lagu bartay xirfado

la taaban karo oo ku saabsan habka looga guuro nidaamka analooga ah (Analog) una gudbo nidaamka baahinta dhijitaalka ah (Digital Broadcasting), iyadoo la soo bandhigay fikrado cusub iyo aragtiyo ku saabsan mustaqbalka isbeddellada teknolojiyada baahinta.

Mussoorie iyo New Delhi, India

Eng. Cabdulhaadi Nuur Ciyow, oo ah Qabiir dhanka Server-yada ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), ayaa ka qeybgalay Tababarka Sare ee Hogaaminta iyo Maamulka (Advanced Leadership Development Program), kaas oo lagu qabtay magaaloyinka Mussoorie iyo New Delhi ee Hindiya intii u dhaxaysay 5-16 August 2024.



Tababarkan ayaa diiradda lagu saaray Hab-maamulka Dhijitaalka (Digital Governance) iyo Amniga Internet-ka (Cybersecurity), kuwaas oo ah arrimo muhiim u ah dowladnimada casriga ah. Waxaa lagu falanqeyyay sida teknolojiyada loogu adeegsan karo hagaajinta hufnaanta maamulka, horumarinta adeegyada dadweynaha, iyo xoojinta kalsoonida muwaadiniinta.



Mid ka mid ah waqtiyada ugu muhiimsanaa tababarka wuxuu ahaa qeybtii ugu dambeysay, halkaas oo ka qaybgalayaashu ay soo bandhigeen mowduucyo ku saabsan hab-maamulka dhijitaalka ah ee waddamadda. Cabdulhaadi ayaa soo bandhigay horumarka iyo caqabadaha Soomaaliya ee dhanka hab-maamulka dhijitaalka ah, isaga oo carrabka ku adkeeyay muhiimadda iskaashiga caalamiga ah iyo xoojinta kaabayaasha dhijitaalka ah si loo gaaro nidaamyo waara oo hufan.

Abidjan, Côte d'Ivoire –



Maxamuud Maxamed Aadan, oo ka tirsan Waaxda Injineerinka ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, ayaa ka qaybgalay tababarka PRIDA ee ku saabsanaa adeegyada isgaarsiinta diyaaradaha (Aeronautical), kaas oo lagu qabtay magaalada Abidjan ee caasimadda Côte d'Ivoire intii u dhaxaysay 19-21-ka Maarso, 2024.

Tababarkan ayaa diiradda lagu saaray sidii loo horumarin lahaa badqabka iyo hufnaanta duulimaadyada caalamiga ah. Waxaa sidoo kale ka soo qaybgalay khubaro dhinaca duulista, sharci-dejiyeyaal, iyo hoggaamiyeyasha hay'ado kala duwan oo caalami ah oo ka shaqeeya isgaarsiinta hawada sare.

Ujeeddada tababarka ayaa ahayd in ka qaybgalayaasha lagu siiyo faham qoto dheer oo ku saabsan nidaamyada isgaarsiinta diyaaradaha, hababka casriga ah ee maaraynta taraafkada hawada, iyo qaab-dhismeedka sharciyeed ee arrintan la xiriira. Mawduucyada muhiimka ah ee tababarka lagu qaadaa-dhigay waxaa ka mid ahaa teknolojiyada isgaarsiinta sare, hababka isgaarsiinta degdega ah, iyo hababka ugu wanaagsan ee nidaaminta isgaarsiinta hawada sare.

Tababarka ayaa waxaa hoggaaminayay macallimiin khuburo ah, iyadoo la adeegsanayay hab isku dhaf ah oo ka kooban aqoon-is-weydaarsi, casharro, iyo tababar toos ah. Tababarkan ayaa ka mid ah dadaallada lagu horumarinayo iskaashiga caalamiga ah ee dhinaca isgaarsiinta diyaaradaha, si loo xaqiijiyo badbaado iyo hufnaan sare oo lagu maareeyo taraafkada hawada.



Guddoomiyaha Jaamacadda Muqdisho oo booqasho shaqo ku yimid xarunta HIQ



Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa xafiiskiisa ku soo dhoweeyay Guddoomiyaha Jaamacadda Muqdisho, Dr. Ibraahim Maxamed Mursal iyo xubno ka tirsan maamulka jaamacadda oo booqasho ku yimid xarunta Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka..

Kulankan ayaa lagu lafaguray aragtiyo ku aaddan horumarinta aqoonta, siyaasadda isgaarsiinta iyo teknolojiyada, iyo sahminta fursadaha iskaashi ee u dhexeeya Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo Jaamacadda Muqdisho. Maareeyaha ayaa hoosta ka xarriiqay muhiimadda iskaashiga iyo wadajirka hay'adaha dowliga ah iyo kuwa waxbarashada si loo gaaro horumar waara.

Dhankiisa Guddoomiyaha Jaamacadda Muqdisho, Dr. Ibraahim Maxamed Mursal ayaa ka mahadceliyay sida sharafta leh ee loogu soo dhoweeyay xarunta HIQ, isagoo Maareeyaha ku ammaanay sida xilkasnimada leh ee uu ku hoggaaminayo HIQ.

Dr. Ibraahim Maxamed Mursal ayaa soo dhoweeyay iskaashi iyo wadashaqayn dhex marta HIQ iyo Jaamacadda Muqdisho.

Qorshaha Istiraatiijiyadda Isbeddelka Awoodda Korjoogteynta HIQ

Istiraatiijiyadda Isbeddelka Xeerndaaaminta Hay'adda waa qorshe faahfaahsan oo ku aaddan casriyeynta qaab dhismeedka xeerarka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada ee Soomaaliya, iyadoo la jaanqaadaysa heerarka Jiilka Afraad (G4) ee Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU).

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa hoggaaminaysa dadaalkan, iyadoo diiradda saareysa in Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada ee Soomaaliya ay noqoto mid horseedda horumarinta bulshada iyo dhaqaalaha iyada oo lagu horumarinayo tartanka, hal-abuurnimada, iyo helitaanka adeegyada dhijitaalka ah.

Ujeedooyinka Muhiimka ah

Ujeedka Istiraatiijiyaddan ayaa ah in la soo saaro qaab korjoogteyn oo fududaynaya in Soomaaliya ay ka gudubto heer Jiilka 2aad (G2) una gudubto heerka Jiilka 4-aad (G4), taas oo ku saleysan dejinta siyaasadaha horumarinta bulshada iyo dhaqaalaha, iyadoo aan la eegayn keliya arrimaha suuqa.

Ujeedooyinka waaweyn waxaa ka mid ah:

1. Xoojinta Maamulka Hay'adda:

Hagaajinta madax-bannaanida Hay'adda, go'aan qaadashada, iyo tayada tiknoolajiyada si loo yareeyo faragelinta siyaasadeed lana xaqiijiyo hufnaanta.

2. Ballaarinta Waajibaadka Hay'adda:

HIQ waxa ay waajibaadkeeda ku dari doontaa kordhinta wadashaqeynta hay'adaha kale ee dowladda sida warfaafinta iyo maamulka Xogta internetka, taas oo keeni doonta hab-maamul dhammeystiran.

3. Dib-u-habeynta Qaab dhismeedka Xeerndaaaminta:

Fududeynta soo gelitaanka suuqa ee shirkadaha cusub, dhiirrigelinta hal-abuurnimada, iyo xaqiijinta hufnaanta, gaar ahaan qiimaha isku-xirka iyo wadaagga kaabayaasha.

4. Hagaajinta Qaab dhismeedka Tartanka Suuqa:

Dejinta xeerndaaamin cad oo ku saabsan sida loo isticmaalayo Awoodda Suuqa (Significant Market Power -SMP) iyo dejinta tilmaamayaal xaqiijinaya ka hortagga waxyaabaha keenaya in tartanka suuqa la waxyeleeeyo.

Tiirarka Istiraatiijiyadda

Si loo gaaro ujeedooyinkan, istiraatiijiyadda waxay diiradda saareysaa afar tiir oo waaweyn:

1. Xoojinta Xeerndaaaminta Hay'adda:

- Madax-bannaanida iyo Isla-xisaabtanka: HIQ waxay balaarin doontaa ilaha maaliyadeed ee ka baxsan miisaaniyadda dawladda si kor loogu qaado awoodda xeer-nidaamineed ee Hay'adda.
- Horumarinta Teknolojiyada: Maalgelinta nidaamyada kormeerka, falanqaynta xogta, iyo howlaha amniga internetka waxay awood u siin doontaa HIQ inay si wanaagsan u maamusho oo u kormeerto qaybaha isgaarsiinta iyo teknolojiyada.
- Kor-u-qaadida Aqoonta Shaqaalaha: Tababar joogto ah oo loo qabto shaqaalaha hay'adda si aqoontooda iyo khibradooda kor loogu qaado.

2. Ballaarinta Waajibaadka korjoogteynta:

HIQ waxay la shaqayn doontaa hay'adaha kale ee dowladda, sida Wasaaradda Warfaafinta, Bankiga Dhexe, Hay'adda Duulista Hawada, iyo Hay'adda Tayodhowrka Soomaaliyeed, si loo abuuro qaab midaysan oo lagu kormeero warbaahinta, xogta dhijitaalka, Teknolojiyada Maaliyadeed iyo teknolojiyada cusub.

3. Dib-u-habeynta Qaab dhismeedka nidaaminta iyo korjoogteynta:

Adeegyada Aan Shatiga Laga Rabin: Soo bandhigida adeegyada aan shati looga baahnayn, taasoo dhiirrigelinaysa hal-abuurka Tiknoolojiyadda.
Wadaagga Kaabayaasha: Waajibinta in shirkadaha isgaarsiinta ay wadaagaan kaabayaasha waxay yareyn doontaa kharashaadka shirkadaha, isla markaana hagaajin doontaa helitaanka adeegyada. Sidoo kale Qiimaha isku xirka oo la shaaciyu waxa ay kor u qaadi doontaa hufnaanta adeegga isku xirka shirkadaha.

Soo kordhinta Xeerndaaaminta Lambarada Guurguura (Number Portability): In la oggolaado in macaamiishu ay sii isticmaali karaan lambarkooda, marka ay ka guurayaan shirkad isgaarsiineed, una guurayaan shirkad kale. Taas waxa ay u qaadi doontaa tartanka iyo tayada adeegga.

4. Hagaajinta Qaab dhismeedka Tartanka Suuqa:

Si loo Xoojiyo tartanka qaybaha muhiimka ah sida Internet ka baaxadda leh (broadband), kaabayaasha isgaarsiinta, Hay'addu waxay hirgelin doontaa qaab sharci ah oo loogu talagalay xakameynta Awoodda Suuqa (SMP) si loo dhiirrigeliyo hal-abuurka.

Natiijooyinka La Filayo

Hirgelinta istaraatiijiyaddan waxay keeni doontaa isbeddello muhiim ah oo ka dhici doona qaybta isgaarsiinta iyo teknolojiyada, iyadoo faa'iidooyin u keenaysa horumarka dhaqan-dhaqaale ee dalka.

Faa'iidooyinka horumarkan laga dhaxlayo waxaa ka mid ah:

- **Adkeynta Tartanka Wanaagsan ee Suuqa:** in loo gudbo qaab dhismeedka korjoogteyn Iyo nidaamin ee Jiilka 4-aad (G4) waxay soo jiidan doontaa maalgelinta, waxayna kobcin doontaa dhaqaalaha dhijitaalka ah.
- **Kor u qaadidda Tayada Adeegyada:** Tartanka iyo hal-abuurnimada oo la dhiirrigeliyo waxay keeni doonaan in la hagaajiyo adeegyada Isgaarsiinta iyo teknolojiyada, iyadoo ka dhigaya kuwo la isku halleyn karo oo la awoodi karo.
- **Adeeg dhijitaal oo loo dhanyahay:** Istaraatiijiyadda waxay xoogga saareysaa ballaarinta helitaanka adeegyada Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada meelaha aysan wali gaarin, si loo dhiirrigeliyo helidda adeeg dhijitaal ah oo la awoodi karo.
- **Ilaalinta Danaha Macaamiisha:** Soo kordhinta xeernidaamiyaha ilaalinta danaha macaamiisha wuxuu awood u siin doonaa hay'adda in ay hubiso in aan lagu xadgudbin danaha macaamiisha, sida tayada adeegyada isgaarsiinta iyo hufnaan qiimayaashooda.

Daneeyayaasha Qeybta ka ah Daneeyayaasha

Istaraatiijiyadda waxaa aasaas u ah iskaashi iyo ka qeybgal ka yimaada dhammaan daneeyayaasha isgaarsiinta iyo Teknolojiyada ee kala duwan:

- **Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka:** waa hay'adda hoggaamineysa hirgelinta istaraatiijiyadda.
- **Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada:** waxa ay mas'uul ka tahay dajinta siyaasadaha isgaarsiinta iyo tiknoolojiyadda, iyo hubinta dhaqangalkooda.
- **Hay'adaha kale ee Dawladda,** sida Wasaaradda Warfaafinta, Hay'adda Duulista Hawada, Bankiga Dhexe iyo Hay'adda Tayowdhorka Soomaaliyeed.

- **Shirkadaha Isgaarsiinta:** Shirkadaha isgaarsiinta waxa ay talooyin iyo fikrado ku biirin doonaan dhaqangelinta istaraatiijiyaddan. Ka qeyb qaadashadooda wada tashiyada dadweynaha ayaa kaalin muhiim ah ka qaadan doona hagaajinta siyaasadaha.
- **Bulshada Rayidka ah:** Macaamiisha iyo ururada difaaca xuquuqda macaamiisha ayaa la tashi lagula samayn doonaa si loo hubiyo in baahidooda la tixgeliyo, taas oo ka qayb qaadan doonta hagaajinta siyaasadaha kor u qaadaya tartanka cadaaladda ah iyo ilaalinta macaamiisha.

Jadwalka iyo Heerarka Dhaqangelinta

Istaraatiijiyadda waxaa lagu hirgelin doonaa afar weji:

1. **Qiimeynta iyo Qorshaynta:** waxaa la sameen doonaa dib u eegista xeer-nidaamiyaasha hadda jira, la tashiyo lala sameeyo daneeyayaasha, iyo diyaarinta qorshe hawleed faahfaahsan oo tilmaamaya ujeeddooyinka gaarka ah, tallaabooyinka, iyo jadwalka dhaqangelinta.
2. **Hirgelinta iyo kor-u-qaadidda Aqoonta:** Wajigaan wuxuu xooga saari doonaa hagaajinta xeerarka, fulinta mashaariicda tijaabada ah, iyo tababarida shaqaalaha hay'adda si ay ula qabsadaan qaab-dhismeedka cusub.
3. **Kor joogteyn iyo Sixid:** Waxaa la sameen doonaa kormeer joogto ah, si loo hubiyo hirgelinta, qiimeynta natiijooyinka la gaaray, lana saxo wixii qaldamay.
4. **Dib-u-eegis iyo Xaqiijinta U-hoggaansanaanta:** Qiimeyn kama dambeys ah ayaa la sameyn doonaa si loo hubiyo howlaha la qabtay ay waafaqsanyihiin heerarka jiilka 4-aad G4, iyadoo dib loo eegi doono si loo ogaado meelaha u baahan in lasii hormariyo mustaqbalka.

Qorshaha Istaraatiijiyadda Isbeddelka Awoodda Korjoogteynta Hay'adda waa qorshe ballaaran oo ku aaddan in la abuurto suuq isgaarsiineed oo leh tartan cadaalad ku dhisan, hal-abuurnimo, iyo dhaqaale dhijitaal oo loo wada siman yahay.

Istaraatiijiyaddan oo Soomaaliya u guurineysa qaab-dhismeedka Jiilka 4aad (G4) ee xeerarka, kaliya ma ahan inay hagaajiso qaybta isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, laakiin sidoo kale waxa ay kor u qaadeyntaa horumarka ballaaran ee bulshada iyo dhaqaalaha.

Madasha Hab-maamulka Internet-ka Soomaaliya 2024, oo socotay muddo labo maalmood ah (30-ka November - 1-da December 2024), ayaa lagu soo gabagabeeyay magaalada Muqdisho. Madashan muhiimka ah ayaa waxaa soo qabanqaabiyay guddi matalayay dhammaan daneenayayaasha kala duwan sida dowladda, shirkadaha gaarka loo leeyahay, bahda waxbarashada, iyo ururrada ulshada.

Madashan, oo ah mid sannadle ah, ayaa diiradda lagu saaray sidii loo xoojin lahaa hab-maamulka internet-ka Soomaaliya iyadoo la adeegsanayo iskaashi iyo wada-shaqeyn.

Madasha ayaa waxaa goobjoog u ahaa xubno ka tirsan baarlamaanka, golaha wasiirrada, guddoomiyeyaal, maareeyayaal, agaasimeyaal, iyo mas'uuliyiin ka socday dhammaan shirkadaha isgaarsiinta, jaamacadaha, bankiyada, iyo ururrada bulshada rayidka ah.



Madasha ayaa waxaa si rasmi ah u furay Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Saalax Axmed Jaamac, oo ku adkeeyay muhiimadda wada shaqeynta iyo isku duubnida si loo horumariyo Hab-maamulka Internet-ka dalka. Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo mas'uuliyiin kale ayaa sidoo kale ka hadlay madasha, iyagoo



MADASHA HAB-MAAMULKA INTERNET-KA SOOMAALIYA



bogaadiyay dadaallada lagu xoojinayo hab-maamulka internet-ka iyo kaabayaasha dhijitaalka ah ee dalka.

Mudadii ay socotay madasha, ayaa waxaa la falanqeyay arrimo muhiim ah oo ku saabsan hab-maamulka internet-ka iyo horumarinta adeegyada dhijitaalka ah ee Soomaaliya, waxaana laga soo saaray talooyin iyo aragtiyo muhiim ah oo lagu dardargelinayo mustaqbalka dhijitaalka ee dalka.

Madasha Hab-maamulka Internet-ka ee Soomaaliya (Somalia IGF) waa madal muhiim ah oo lagu falanqeyo, iskula wadaago, loogana wada tashado arrimaha khuseeya hab-maamulka internet-ka. Madashan waxay si gaar ah diiradda u saartay kor u qaadista wacyiga bulshada, dhiirrigelinta wada shaqeynta, iyo xoojinta ka qeybgalka dhammaan daneeyayaasha ku lugta leh hab-maamulka internet-ka ee Soomaaliya.





Socdaalkii Waxbarashada ee Iskaashiga Dowladda iyo Ganacsatada Gaarka ah (PPP Study Tour)

Ankara, Turkiga – Cabdicasiis Maxamed Cabdi, Madaxa Maamulka iyo Maaliyadda ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), ayaa ka qeybgalay Socdaal Waxbarasho oo la xiriira Iskaashiga Dowladda iyo Ganacsatada Gaarka ah (Public-Private Partnership - PPP Study Tour), kaas oo lagu qabtay Turkiga intii u dhaxaysay 1-da ilaa 5-ta Luulyo, 2024.

Socdaalkan ayaa diiradda lagu saaray sidii ka-qaybgalayaasha loogu bari lahaa hab-raacyo sharciyeed, maaliyadeed, iyo farsamo oo ka dambeeya guulaha mashruucyada iskaashiga Dowladda iyo shirkadaha gaarka ah ee Turkiga. Wafdiga ka socday Soomaaliya, oo uu ku jiray Cabdicasiis, ayaa fursad u helay inay wax ka bartaan sida loo qorsheeyo mashruucyada waaweyn ee kaabayaasha muhiimka ah, iyadoo la adeegsanayo iskaashi dhex mara Dowladda iyo ganacsatada.

Intii uu socdaalka waxbarashada socday, wafdiga ayaa booqasho ku tagay mashruucyo muhiim ah sida Cisbitaalka Ankara Bilkent City, oo tusaale u ah sida iskaashiga iskaashi dhex mara Dowladda iyo ganacsatada (PPP) loogu adeegsan karo horumarinta adeegyada caafimaadka, iyo Mashruuca Sincan ee Maareynta Qashinka, kaas oo muujinaya hababka casriga ah ee qashinka loogu beddelo tamar waarta. Waxa kale oo booqasho ay ku tageen Tuunelka Eurasia, oo isku-xiraya Yurub iyo Aasiya, taas oo sare u qaaday isku-xirka dhaqaalaha.

Sidoo kale, wafdiga ayaa booqday Mashruuca Wadada Waqooyiga Marmara (Buundada 3-aad ee Bosphorus), oo lagu baranayay sida kaabayaasha waaweyn ay kor ugu qaadaan dhaqdhaqaaqa dhaqaalaha iyo horumarinta gobollada.

Waxaa intaas dheer, Garoonka Diyaaradaha Esenboğa ee Ankara ayaa lagu soo bandhigay sida iskaashiga dowladda iyo ganacsata loogu horumarin karo kaabayaasha garoomada diyaaradaha si loo hubiyo marin-u-helidda guud iyo kor u qaadista dhaqaalaha.

Socdaalka Waxbarashada ee Wafdiga Soomaaliya ka socday ayaa ka caawin doonta dalkeenna horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha, adeegyada isgaarsiinta, iyo mashruucyo kale oo waaweyn oo horseedi kara horumar dhaqaale iyo adeeyo hufan.



R/WASAARAHA

oo Dhagax Dhigay Dhismooyin Cusub

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xamsa Cabdi Barre, ayaa dhagax dhigay dhismooyin cusub oo ay yeelan doonaan Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimillada, Hay'adaha Isgaarsiinta Qaranka, Dhowrista Xogta iyo Tayo-dhowrka.

Xarumahan oo dhamaantood lagu dhisayo isku-tashi dadwayne, ayaa qayb ka ah qorshaha Xukuumadda DanQaran ee dib-u-dhiska xarumaha dowladda, kuwaas oo laga dhisayo waddada Jayga ee u dhow Garoonka Caalamiga ah ee Aadan Cadde.

Ra'iisul Wasaaraha ayaa tilmaamay in dhismayaashani ay qeyb ka yihiin dadaallada Xukuumadda DanQaran ay ugu



jirto dib-u-dhiska xarumaha dowladda, si shacabka Soomaaliyeed ay u helaan adeeg hufan.

R/Wasaaraha waxaa munasabaddan ku wehliyay xubno ka mida goliihiisa wasiirada iyo madaxda hay'adaha Isgaarsiinta Qaranka, Dhowrista Xogta iyo Tayo-dhowrka.

Shirweynaha Isbeddelka Cimilada ee Qaramada Midoobay (COP29)



Wafdi uu hoggaaminayo Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka(HIQ), Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa ka qeybgalay Shirweynaha Isbeddelka Cimilada ee Qaramada Midoobay (COP29) ee lagu qabtay magaalada Baku ee dalka Azerbaijan, kaasoo socda 11-22kii Nofeembar, 2024.

Maareeyaha ayaa madasha ku soo bandhigay doorka Soomaaliya ee adeegsiga teknoloojiyada si wax looga qabto caqabadaha cimilada. Dhinaca kale wuxuu ka qeybgalay dood cilmiyeedyo ku kala saabsanaa "Garaadka Macmalka ee Digniinta Degdegga ah ee Dhammaan" (AI for Early Warnings for All - EW4All) oo diiradda lagu saaray sidii garaadka macmalka loogu adeegsan lahaa yareynta nuglaanta cimilada iyo badbaadinta nolasha.

Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh Maareeyaha Guud ee HIQ, wuxuu kaloo ka qaybgalay dood cilmiyeed cinwaankeedu ahaa "Qorshaha Dhijitaalka ee Cagaaran" (Green Digital Action) oo xoogga lagu saaray isku-darka hal-abuurka dhijitaalka ah iyo xeeladaha cimilada si loo yareeyo saameynta deegaanka loona dhiso kaabayaal adkeysiga leh.

Intii shirku socday, Soomaaliya waxay taageertay Baaqa Hawlaha Dhijitaalka Cagaaran, sinnaanta dhijitaalka iyo dhisidda kaabayaasha adkaysiga leh.





Kulan Wadatashi ah
NCA & NIRA
 Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaranka

Sebteembar, 2024

Kulan Wadatashi ah oo ay Wadajir u Qabteen Hay'adaha Isgaarsiinta Qaranka iyo Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) iyo Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaranka (National Identification and Registration Authority (NIRA) ayaa maanta si wadajir ah u qabtay kulan wadatashi oo ku saabsan kaalinta Nidaamka Aqoonsiga Qaranka iyo adeegyada shirkadaha isgaarsiinta, iyo isku xirka nidaamka Aqoonsiga Qaranka iyo adeegyada isgaarsiinta ee dalka.

Kulankan ayaa waxaa kasoo qeybgalay madaxda hay'adaha NIRA iyo HIQ iyo mas'uuliyiin ka kala socda shirkadaha isgaarsiinta dalka. Kulanka ayaa waxaa daahfuray Maareeyaha Guud ee NIRA, Cabdiweli Cali Cabdulle, iyo Mustafa Yasin Sheekh, Maareeyaha Guud ee HIQ, iyadoo ka hadlay heerarka kala duwan ee uu soo maray nidaamka Aqoonsiga Qaranka, iyo sidii loogaarsiiin lahaa guud ahaan dalka.

Maareeyaha Guud ee NIRA, Mudane Cabdiweli Cali Cabdulle, oo kulanka ka hadlay ayaa yiri: "Iskaashiga ka dhexeeya NIRA iyo shirkadaha isgaarsiinta waa tallaabo muhiim ah oo lagu xaqiijinayo in nidaamka Aqoonsiga Qaranka uu noqdo mid la isku halleyn karo oo wax ka taraya

adeegyada isgaarsiinta ee Soomaaliya. Wada shaqeyntani waxay siinaysaa ummadda Soomaaliyeed fursad ay ku heli karaan aqoonsi rasmi ah, waxayna fududaynaysaa aqoonsiga macaamiisha ee shirkadaha isgaarsiinta."

Sidoo kale, Maareeyaha Guud ee HIQ, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa



sheegay: "Dhismaha nidaamka Aqoonsiga Qaranka wuxuu muhiim u yahay horumarinta isgaarsiinta dalka iyo ilaalinta danaha macaamiisha.

Waxaan diyaar u nahay inaan si dhow ula shaqeyno shirkadaha isgaarsiinta si aan u hubinno in nidaamkani uu noqdo mid wax ku ool ah oo si buuxda ugu shaqeeya macaamiisha Soomaaliyeed."

Warbixinno kala duwan ayaa lagu soo bandhigay kulanka, kuwaas oo ay ka mid yihiin shuruucda diiwaangelinta iyo Aqoonsiga Qaranka, iyo sida loo fulin doono diiwaangelinta SIM-ka iyo adeegyada isgaarsiinta.



Kulanka ayaa waxaa sidoo kale lagu falanqeyay istiraatiijiyadda hawlgelinta, fursadaha iskaashi, iyo meelaha ay iska kaashan karaan NIRA, HIQ, iyo shirkadaha isgaarsiinta, iyadoo la xoojinayo ujeeddada guud ee ah in la horumariyo adeegyada isgaarsiinta ee muwaadiniinta Soomaaliyeed.

Shirkadaha isgaarsiinta ayaa soo dhaweeyay iskaashiga iyo wada



shaqaynta la xiriirta Nidaamka Aqoonsiga Qaranka, iyadoo caddeeyay inay diyaar u yihiin inay la shaqeeyaan NIRA iyo HIQ si ay uga qayb qaataan isku xirka nidaamka Aqoonsiga Qaranka iyo adeegyada isgaarsiinta.

Sidoo kale, shirkaduhu waxay ballanqaadeen inay gacan ka geysan doonaan diiwaangelinta macaamiisha.



QORSHAHA QARAN EE ISGAARSIINTA XAALADAHHA DEGDEGGA

Warbixin Kooban

Qorshaha Qaranka ee Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga ah ee Soomaaliya (NETP), oo ay soo diyaarisay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), wuxuu door istiraatiijiyadeed ku leeyahay maaraynta khataraha musiibooyinka isaga oo hubinaya in kaabayaasha isgaarsiinta iyo Teknolojiyada loo isticmaali karo dhammaan afarta marxaladood ee maaraynta musiibooyinka, ee kala ah; **ka hortagga, u diyaargarowga, ka jawaabidda, iyo soo kabashada.**

Ujeedooyinka ugu waaweyn ee qorshahan waxay ka mid yihiin sameynta kaabayaal isgaarsiineed oo adkeysa leh, ku biirinta teknolojiyada isgaarsiinta siyaasadaha maareynta musiibooyinka, iyo isku dubaridka iyo isku xirka hay'adaha kala duwan ee dowladda, shirkadaha isgaarsiinta, iyo bulshada rayidka, si loo joogteeyo isgaarsiinta inta lagu jiro xaaladaha degdegga ah.

Qorshahan wuxuu muujinayaa doorka muhiimka ah ee isgaarsiinta ku leedahay maaraynta musiibooyinka, iyada oo isku-xireysa qeybaha isgaarsiinta iyo teknolojiyada iyo nidaamka guud ee maaraynta khataraha musiibooyinka.

Isku xirkani wuxuu suurtagelinayaa in si degdeg ah looga jawaabo xaaladaha degdegga ah iyo in si dhaqso leh looga soo kabto, sidoo kale wuxuu hubinayaa in si fudud digniinaha khataraha la gaarsiyo dadka loogu talo galay, si ay u noqdaan kuwo waxtar leh oo degdeg ah. Qorshuhu wuxuu la jaan qaadayaa Siyaasadda Qaranka ee Maaraynta Musiibooyinka (National Disaster Management Policy -DMP), si loo xaqiijiyo istiraatiijiyad qaran oo midaysan.

Ujeedooyinka Muhiimka ah:

1. In la hubiyo Abuuridda Nidaamyo Isgaarsiineed oo adkeysa leh: istiraatiijiyadda waxa ay soo gudbineysaa qorsho-howleed dhammeystiran si loo ilaaliyo shabakadaha isgaarsiinta inta lagu jiro maareynta musiibooyinka, kuwaas oo muhiim u ah isku xirka dowladda, shirkadaha iyo hay'adaha ka shaqeeya gurmada.

2. Dhiirigelinta Iskaashiga iyo Wadashaqeynta: Iyadoo la horumarinayo iskaashiga ka dhexeeya hay'adaha dowladda, shirkadaha isgaarsiinta, iyo bulshada rayidka, qorshahan wuxuu keenayaa hab midaysan oo loo wajaho maaraynta khataraha musiibooyinka.

3. Xoojinta u diyaar garowga iyo Nidaamyada

Digniinaha: qorshaha wuxuu mudnaanta siinayaa horumarinta nidaamyada digniinaha si loo faafiyo macluumaadka ku saabsan khataraha

suurtagalka ah si waxtar leh.

Isticmaalka Isgaarsiinta ee Marxaladaha Maareynta Musiibooyinka

1. Ka hortagga: Isgaarsiinta waxay taageerayaan qiimaynta khataraha, aqoonsiga khataraha, iyo faafinta digniinaha. Muhimadda waa yareynta nuglaanta khataraha ee kaabayaasha isgaarsiinta iyo hubinta nidaamyada isgaarsiinta in ay yihiin kuwo u adkeysan kara khataraha, ka hor inta musiibooyinka dhicin.

2. U Diyaargarowga: Dejinta nidaamyada digniinaha, diyaarinta qorshayaal ka hortagga, iyo fulinta tababaro joogto ah. Isgaarsiinta waxay door muhiim ah ka ciyaartaa hubinta isku-xirka aan kala go'a lahayn ee u dhexeeya gurmada degdegga ah iyo hay'adaha dowladda.

3. Ka jawaabidda: Inta lagu jiro musiibada, isgaarsiinta waxa ay fududeysaa hawlaha gurmada, waxayna keeneysaa in isgaarsiinta u dhaxeysa hay'adaha gurmada degdegga ah, hay'adaha dowladda, iyo bulshooyinka waxyeelada soo gaartay aysan go'in.

4. Soo kabashada: Ka dib musiibada, dib u soo celinta iyo dib u dhiska kaabayaasha isgaarsiinta ee burburay waa lagama maarmaan, si adeegga isgaarsiinta u wada gaaro dhammaan dadka ku nool meelaha musiibooyinka ay ka dhaceen. qorshahan wuxuu dhiirrigelinayaa mabda'a ah "dhisidda kaabayaal ka wanaagsan kuwii burburay," iyadoo la hubinayo in casharradii laga bartay lagu dabaqo dhismaha kaabayaasha cusub, si loo hagaajiyo jawaabaha musiibooyinka mustaqbalka.

Daneeyayaasha kala Duwan ee Hirgelinta Qorshahan:

Daneeyayaasha muhiimka ah ee ku lug leh Qorshahan waxaa ka mid ah HIQ, Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Qaranka ee Soomaaliya (SoDMA), Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha, shirkadaha isgaarsiinta, iyo Ururka Isgaarsiinta Caalamiga (ITU). Iskaashigoodu waa muhiim si loogu guuleysto hirgelinta qorshahan, loona helo taageero farsamo loogu talagalay maaraynta khatarta musiibooyinka.

Gebogebadii, Qorshahan wuxuu abuurayaa qaab dhismeed dhamaystiran oo lagu hubinayo kaabayaasha isgaarsiinta ee adkaysiga leh inta lagu jiro musiibooyinka, wuxuu dhiirrigelineyaa iskaashiga ka dhexeeya hay'adaha dowladda iyo shirkadaha isgaarsiinta. Sidoo kale, wuxuu fududeynayaa isticmaalka Teknolojiyada ee howlaha kala duwan ee maareynta musiibooyinka, sida ka hortagga, ka jawaabidda iyo soo kabashada.





Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), iyadoo kaashanaysa Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU) iyo GSMA, ayaa si rasmi ah u daahfurday kulan heer sare ah oo ku saabsan Fulinta Qorshaha Qaran ee Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga ah (NETP).

Kulanka, oo uu furay Wasiirka Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Mudane Xildhibaan Maxamed Aadan Macallin Cali, ayaa waxaa ka qeybgalay mas'uuliyiin ka socda Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka,

FULINTA Qorshaha Qaran ee Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga



Hay'adda Maareynta Musiibooyinka, Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha, wakiilo ka socda shirkadaha Isgaarsiinta, iyo sidoo kale wufuud ka socota ururro caalami ah oo ay ka mid ahaayeen Ururka Isgaarsiinta Caalamiga (ITU), Ururka Nidaamka Caalamiga ah ee Isgaarsiinta Mobilka (GSMA), UNICEF, IFRC, UNDP, iyo Bangiga Adduunka.

Maareeyaha Guud ee Hay'adda, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa kulanka ka hadlay ayaa xusay doorka muhiimka ah ee ay leeyihiin shirkadaha isgaarsiinta ee ku aaddan ilaalinta isgaarsiinta xaaladaha degdegga ah, isagoo yiri: "Qorshaha Qaran ee Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga



ah waxay si weyn ugu tiirsan tahay ka qaybgalka firfircoon ee shirkadaha isgaarsiinta dalka.

Kaabayaashooda, adeegyadooda, iyo aqoontooda farsamo ayaa udub dhexaad u ah qaab-dhismeedka isgaarsiinta xaaladaha degdegga ah ee Soomaaliya. Qorshahan waa muhiim si loo hubiyo in kaabayaasha isgaarsiinteenna ay sii ahaadaan kuwo shaqeynaya oo lagu kalsoonaan karo xilliyada musiibooyinka.”



Wasiirka Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Mudane Maxamed Aadan, ayaa intii lagu guda jiray xafladda furitaanka yiri, “Isgaarsiintu waxay muhiim u tahay gurmada iyo maareynta musiibooyinka, kulankanna wuxuu muujinayaa sida ay nooga go’an nahay ilaalinta noloshu shacabka Soomaaliyeed. Waxaan hiigsaneynaa inaan dhisno kaabayaal isgaarsiineed oo adag oo adkeysa leh, kuwaas oo si wax ku ool ah uga jawaabi kara xaaladaha degdegga ah islamarkaana kor u qaadi kara awooddeena qaran ee maaraynta musiibooyinka iyo hababka digniinaha iyadoo la isticmaalayo shabakadaha isgaarsiinta ”



Mas'uuliyiin ka socda Ururka Isgaarsiinta Caalamiga (ITU) iyo GSMA ayaa sidoo kale ka hadlay kulanka, iyadoo bixiyay aragtiyo ku saabsan fulinta NETP, Habka Digniinta Guud (CAP), iyo Nidaamyada Digniinta Hore ee ku shaqeeya farriimaha Mobilka (CB EWS), kuwaas oo muhiim u ah faafinta digniino degdeg ah inta lagu jiro xaaladaha degdegga ah.



Kulankan oo socday afar maalmood ah ayaa lagu lafagurey doorarka iyo mas'uuliyadka ku aaddan hirgelinta qorshaha NETP, si loo hubiyo in dhammaan daneeyayaasha ay gacan ka geystaan nidaamka isgaarsiinta xaaladaha degdegga ah.

Natijjooyinka kulankan laga dhaxlay ayaa waxaa ka mid ahaa in si weyn loo fahmay qaab-dhismeedka Qorshaha Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga ah ee Qaranka, iyo qaababka ugu habboon ee looga hortagi karo xaaladaha degdegga ah ee mustaqbalka.



Aqoon Isweydaarsi

Xeernidaamiyeyaasha tartanka suuqa isgaarsiinta iyo xargaha fiberka.



Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), iyadoo kaashaneysa Hay'adda Maaliyadda Caalamiga ah (International Finance Corporation (IFC)), ayaa waxay qabatay aqoon-isweydaarsi diiradda lagu saarayay xeernidaamiyeyaasha tartanka suuqa isgaarsiinta iyo xargaha fiberka badda.

Aqoon-isweydaarsigan oo socday labo maalmood ayaa lagu qabtay magaalada Nayroobi. Waxaana ka qaybgalay daneeyayaasha muhiimka ah ee qaybta isgaarsiinta Soomaaliya, oo ay ugu horreeyeen shirkadaha Isgaarsiinta, khubarro, madax iyo saraakiil ka tirsan dowladda.

Aqoon isweydaarsigaan ayaa intii uu socday waxaa looga wada hadlay qaab-dhismeedka xeer-nidaamiyayaal qaabeyn doona mustaqbalka kaabayaasha dhijitaalka ah ee Soomaaliya.

Aqoon-isweydaarsigan oo qayb ka ah qorshaha istiraatiijiyadeed ee HIQ ee kor u qaadida isku-xirnaanta qaranka, ayaa waxaa kaloo looga hadlay arrimo muhiim ah sida shatiyeynta soo degista xargaha badda hoosteeda, tixgelinta saamaynta deegaanka, wadaagga kaabayaasha, iyo dhiirrigelinta tartanka qaybta isgaarsiinta.



Xeer-nidaamiyayaashan ayaa ujeedkoodu yahay in la waafajiyo qaab-dhismeedka isgaarsiinta Soomaaliya heerarka caalamiga ah, taasoo taageeraysa yoolalka horumarinta dhaqaalaha qaranka.

Danjire Jabriil Ibraahim Cabdulle, Safiirka Soomaaliya ee Kenya oo furay aqoon-isweydaarsiga, ayaa ku dheeraaday muhiimadda uu leeyahay aqoon-isweydaarsiga, isagoo xusay sida shirkadaha gaarka loo leeyahay ay uga qayb qaateen soo kabashada iyo koritaanka dhaqaale ee dalka.

Mudane Mustafa Yaasin Sheekh, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, ayaa sidoo kale hoosta ka xariiqay muhiimadda iskaashiga ka dhexeeya hay'adda iyo daneeyayaasha isgaarsiinta intii uu socday hadalladiisa la xiriira aqoonsi-waydaarsiga.



NCA iyo IFC oo heshiis kala saxiixday



Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) iyo Hay'adda Maaliyadda Caalamiga ah (IFC) ayaa magaalada Nairobi ku kala saxiixday heshiis iskaashi oo muhiim ah. Heshiiskan ayaa diiradda saaraya horumarinta kaabayaasha isgaarsiinta ee Soomaaliya, iyadoo IFC ay taageero farsamo ku bixin doonto sidii loo xoojin lahaa adeegyada isgaarsiinta iyo hal-abuurka teknolojiyada ee dalka.

Heshiiska ayaa waxaa labada hay'adood u kala saxiixay Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, iyo Marwo Amena Arif, Madaxa Hay'adda IFC ee dalalka Kenya, Tanzania, Uganda, Rwanda, Burundi, Soomaaliya, iyo Malawi.

Munaasabadda saxiixa heshiiska waxaa goob-joog ka ahaa Safirka Soomaaliya ee Kenya, Mudane Jabriil Ibraahim Cabdulle, iyo mas'uuliyiin kale oo ka kala socday labada hay'adood.

Shirweynaha Caalamiga ah ee **HEERARKA** **ISGAARSIINTA** **(WTSA-24)**

Qaar ka mid ah agaasimayaasha, la-taliyeyaasha, iyo shaqaalaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada ayaa ka qeybgalay Shirweynaha Caalamiga ah ee Heerarka Isgaarsiinta (World Telecommunication Standardization Assembly "WTSA-24") ee lagu qabtay magaalada New Delhi, dalka Hindiya, kaasoo socday 14ka ilaa 24ka Oktoobar 2024.

Shirweynahan, oo uu soo qabanqaabiyay Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU), ayaa isu keenay siyaasad dejiyeyaasha caalamiga ah iyo hoggaamiyeyaasha qeybta Isgaarsiinta & Teknolojiyada si ay u hagaan mustaqbalka heerarka teknolojiyada isgaarsiinta iyo kaalinta teknolojiyada soo kororta ee ku aaddan dhisidda adduun isku-xiran oo dhijitaal ah.

Wafdigu waxay ka qayb galeen kalfadhyaal muhiim ah oo lagu falanqeyay mawduucyo ay ka mid yihiin maamulka garaadka macmalka (AI), Barnaamijta ilahoodu furan yihiin (Open-source software), iyo mustaqbalka kaabayaasha dhijitaalka. Kulamadan ayay wafdigu ka heleen aragtiyo qiimo leh oo ku saabsan isku dhafka heerarka caalamiga ah ee qeybta isgaarsiinta Soomaaliya iyo dhiirrigelinta hal-abuurka adeegyada dhijitaalka ah.

Intii shirweynuhu socday, wafdiga waxay kulamo doceedyo la yeesheen qaar ka mid ah wafuuddii shirka ka soo qeybgalay, oo ay ka mid ahaayeen Agaasimaha Xafiiska Heerarka ee ITU, madax ka tirsan Hay'adda Injineerinka Korontada iyo Elektarooniga (IEEE) iyo Ururka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada Macluumaadka Carabta, iyadoo ka wada hadlay iskaashi ku saabsan qaadashada heerarka caalamiga ah, amniga internet-ka, iyo mashaariicda garaadka macmalka (AI).



Sahanka Qiimeynta

BAAHIDA GANACSIGA ADEEGGA ELECTAROONIGA AH EE DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Hordhac

E-ganacsiga (E-commerce), oo loo soo gaabiyo ganacsiga elektaroonigga ah, waxa loola jeedaa ku iibinta badeecadaha ama alaabaha internetka. Waxay noqotay ifafaale caalami ah, oo wax ka beddelaya sida ganacsiyadu u shaqeeyaan iyo sida ay macaamiishu wax u iibsanayaan. Isticmaalka online ka, dadku hadda waxay ka iibsan karaan alaabada meel kasta oo adduunka ah, saamaynta e-ganacsiga waa kor ukaca muhiimka ah ee dhaqaalaha dhijitaalka ah, ereyga ayaa tilmaamaya dhaqdhaqaaq dhaqaale oo si weyn ugu tiirsan teknolajiyada dhijitaalka ah sida internetka.

Soomaaliya oo ah dal dib u dhis iyo kobcinaya kaabayaashiisa, e-ganacsiga (e-commerce) wuxuu u yahay fursad muhiim ah kobaca iyo horumarka dalka. E-ganacsigu waxa uu kordhiyaa dhaqaalaha dhijitaalka ah isaga oo balaarinaya gaarista suuqa ee ganacsiyada, taas oo u ogolaanaysa in ay ku xirmaan macaamiil caalami ah. Macaamiishu waxay ka heleyaan adeegga wax iibsiga waqti kasta iyo meel kasta iyagoo jooga.

Doorashada iyo tartanka suuqa onlineka ayaa keenaya qiimo jaban iyo alaabooyin kala duwan in la helo. Hufnaanta adeegga oo la wanaajiyo ayaa sahlaya wax kala iibsiga, uuna diyaar yahay 24/7 waqti kasta.


Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo kaashanaysa Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolajiyada ayaa sameysay xog-ururin lagu qiimeynayo baahiyaha Ganacsiga Elektarooniga ah ee dalka ka jira.

Ujeeddada sahankani waxay ahayd in la fahmo heerka uu maanta marayo, baahiyaha gaarka ah ee ganacsatada Soomaaliyeed ee ku wajahan e-ganacsiga, isbeddelka dhijitaalka ah, horumarinta dhaqaalaha dhijitaalka ah, caqabadaha, iyo hamiga mustaqbalka ee ganacsiga Elektarooniga ah ee Soomaaliya.


Dulmarka Daraasadda

Sahanku waxa uu jawaabo ka ururiyay milkiilayaasha iyo daneeyayaasha ganacsiyo kala duwan. Fikradaha muhiimka ah ee tirakoobka dadweynaha waxaa ka mid ah:


- **Qeybaha da'da:** Inta badan jawaab bixiyaasha waxay u dhaxeeyaan 18-30 iyo 31-45, taasoo muujinaysa muuqaal wanaagsan oo la xiriira e-ganacsiga iyo ku lug-laahayashaha dhalinyarada.



- **Jinsiga:** Jawaab bixiyaashu waxay u badnaayeen rag, taas oo muujinaysa baahida loo qabo kordhinta ka qaybgalka haweenka ee e-ganacsiga.




- **Heerka Waxbarashada:** Inta badan jawaab bixiyaasha waxay haysteen waxbarasho heer jaamacadeed ama ka sarreysa, taasoo muujineysa bulsho ganacsato ah oo aqoon leh.




- **Nooca Ganacsiga:** Goobo ganacsi oo kala duwan ayaa daraasaddan lagu sameeyay, waxaana muuqatay in ganacsiga la wada leeyahay ama shuraakada ah uu yahay ganacsiga ugu badan ee dalka ka jira

Ganacsiga gaarka loo leeyahay ama hantida shakhsiyadeed ayaa isna noqday ganacsiga labaad ee ugu badan ee dalka ka jira.



Waa socotaa ... eeg bogga 3raad

• **Qeybaha Ganacsiga:** Qeybaha Ganacsiga la daraaseeyay ayaa ka koobnaa, kuwa cuntada & cabitaanka, e-ganacsiga, waxbarashada & kuwa kale.




Isticmaalka iyo La-qabsashada


• **Internetka iyo Isticmaalka Mobeylka:**

Kororka isticmaalka internetka iyo taleefannada gacanta ayaa siinaya dadka fursad wanaagsan oo ay ku bilaabaan ganacsiga dhijitaalka ah.

Taleefannada casriga ah (Smart phone) ayaa noqday kuwa loogu isticmaalka badan yahay.




Isticmaalka internetka Mobile ka ayaa noqday kan ugu badan oo ay dadku isticmaalaan



• **Goobaha Ganacsiga Elektarooniga ah:** ganacsiyo badan ayaa hadda isticmaala gooba ganacsi oo caalami ah xaga ganacsiga electrooniga ah balse waxa jira baahi loo qabo mid dalka ah.


Sida uu muujinayo jaantuska hoose warbaahinta dhijitalka ah ee ugu badan oo la isticmaalo ayaa ah Facebook-ga oo in ka badan 66% ayaa isticmaasha.




Caqabadaha

Sahanku wuxuu tilmaamay dhowr caqabadood oo muhiim ah oo hortaagan kobaca ganacsiga elektaroonigga ah ee Soomaaliya:


• **Kaabayaasha:** Kaabayaasha internet-ka oo aan ku filnayn iyo koronto yaraanta ayaa ah caqabadaha jira.




Xawaaraha internetka ayaa daraasadda qayb ka ahaa, xogtii la soo ururiyay, waxaa ka soo baxday in xawaaraha internetku uu wanaagsan yahay.




• **Nidaamka lacag bixinta:** hababka lacag bixinta oo xadidan ayaa ka dhigeysa in ay caqabad ku noqoto hababka lacag isweydaarsiga online-ka.



• **Saadka alaabta:** Helitaanka hufan ee adeegyada saadka ayaa ah kuwa aan horumarsaneyn, taas oo saameynaysa gaarsiinta alaabaha macaamiisha. Su'aal ahayd sideed macaamiisha u gaarsiisaa alaabta? ayaa jawaabtii ka soo baxday ay noqotay sida Jaantuskan hoose ka muuqata.



Su'aal kale oo ahayd maxay yihiin caqabadaha qaybinta iyo keenista alaabta, xogtii ka soo baxday ayuu jaantuskani muujinayaa.




Waa socotaa ... eeg bogga 3aad

Hamiga iyo Fursadaha


Kobaca Ganacsiga

Ganacsiyadu waxay rajo ka qabaan mustaqbalka, iyadoo badidoodu ay higsanayaan:


- **Taageerada Dowladda:** Waxaa jirta rajo fiican oo laga filayo dowladdu inay door firfircoon ka qaadato abuurista hab ku habboon ganacsiga elektaroonigga ah iyada oo loo marayo siyaasado taageero u ah, xeerar, iyo horumarinta kaabayaasha.




Caqabadaha ka jira u hoggaansaan la'aanta sharciga



- **Balaarinta Waxsoosaarka iyo Gaarsiinta Adeegyada:** Jawaab bixiyaal badan ayaa qorshaynaya in ay kala duwaan adeegyadooda si ay u daboolaan baahiyaha macaamiil badan.



- **Kordhinta Saamiga Suuqa:** In diiradda si xoog leh loo saaro qabashada suuqa weyn iyadoo la xoojinayo dhanka online-ka.



Astaamaha la rabo in ay yeeshan Goobaha e-Ganacsiga

Jawaab bixiyaashu waxay iftiimiyeen dhowr astaamood oo ay jeclaan lahaayeen inay ku arkaan goobaha e-ganacsi, oo ay ka mid yihiin:

- **La awoodi karo:** xalal wax ku ool ah in lagu dabaqo
- **Helitaan Fudud:** goobaha ganacsiga onlineka waa inay noqdaan kuwo si fudud u heli karaan isticmaalayaasha, gaar ahaan mobilada iwm.
- **La beddelan karo:** ganacsiyadu waxay rabaan goobo la jaanqaadi kara baahidooda gaarka ah.
- **Taageero iyo Tababar:** Waxaa jira baahi loo qabo adeegyo taageero oo wanaagsan iyo tababar si looga caawiyo ganacsiyada inay si wax ku-ool ah uga faa'iideystaan aaladaha e-ganacsiga

Gunaanad

Qiimaynta ganacsiga elektarooniga ah ee Soomaaliya waxay muujinaysaa muuqaal leh suurtoagal badan, balse waxa jiro caqabado waaweyn. Heerarka sare ee isticmaalka internetka iyo mobilada, oo ay weheliyaan dhallinyarada aqoonta leh ee hal-abuurka ganacsi sameystay, waxay dhigayaan aasaas adag oo kobaca e-ganacsiga ah.

Si kastaba ha ahaatee, dayaca kaabayaasha, helitaanka xaddidan ee nidaamyada lacag-bixinta amniga leh, iyo shabakadaha saadka oo aan si buuxda u horumarsaneyn ayaa hor istaagaya horumarka. Si awoodda e-ganacsiga si buuxda kor loogu qaado, waxaa loo baahan yahay dadaal wadajir ah oo ka yimaada dhammaan daneeyayaasha.

Ganacsiyada waa inay qaataan aaladaha online-ka ah, kala duwanaadaan badeecadaha ay bixiyaan, oo si firfircoon u raadiyaan inay ballaariyaan gaaristooda suuqa. Dowladdu waa inay door muhiim ah ka ciyaarto iyada oo abuuraysa jawi taageero leh iyada oo loo marayo siyaasado bartilmaameedsan, sidoo kale maalgashi ku sameysa kaabayaasha, iyo kor u qaadista aqoonta dhijitaalka ah.

Horumarinta aaladaha ganacsiga elektarooniga ah ee gudaha oo la awoodi karo, la heli karo, oo loo habeeyay baahiyaha gaarka ah ee ganacsiyada Soomaaliyeed waa mid muhiim ah.

Haddii la xalliyo caqabadahaas, lagana faa'iideysto fursadaha jira, Soomaaliya waxay adeegsan kartaa awoodda buuxda ee ganacsiga elektarooniga ah, kor u qaadi kartaa kobaca dhaqaalaha, awood siin kartaa ganacsiyada waaweyn iyo kuwa yaryarba, taasoo horumarin karta noloshu muwaadiniinta Soomaaliyeed.

XARUNTA XOGTA QARANKA



Kormeerkii Wasiiru-dowlaha iyo Maareeyaha Guud

Wasiiru-dowlaha Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada XFS Md. Axmed Cismaan Diiriye iyo Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Md. Mustaf Yaasin Shiikh, ayaa si wadajir ah kormeer shaqo ku tagay Xarunta Xogta Qaranka oo dhismaheedu marayo heer gebogebo ah.

Xaruntaan, oo ah mid casri ah, marka la dhammeystiro, waxay martigelin doontaa dhammaan xogaha hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dawliga ahayn. Xaruntan ayaa waxaa laga dhisayaa meel ku dhow halka internetka dalka ka soo galo, gaar ahaan agagaarka Garoonka Diyaaradaha Aadan Cadde, taasoo ka dhigaysa goob istiraatiiji ah oo muhiim u ah amniga iyo maamulka xogaha muhiimka ah ee dalka.

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Md. Mustaf Yaasin Shiikh, oo ka hadlay kormeerka kadib, ayaa yiri: "Waa muhiim inaan xoojino kaabayaasha teknolojiyada si aan ula jaanqaadno horumarka dunida. Xaruntan xogta qaranka waxay muhiim u tahay ilaalinta

iyo kaydinta xogaha muhiimka ah ee hay'adaha dowladda iyo kuwa kale ee aan dawliga ahayn. Marka dhismahani dhamaado, waxa xigi doona in si casri ah loo qalabeeyo, taasoo ka dhigaysa xarun heer caalami ah oo u adeegta qaranka."

Wasiiru-dowlaha Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Md. Axmed Cismaan Diiriye, ayaa sidoo kale tilmaamay muhiimadda ay xaruntani u leedahay qaranka, isagoo yiri: "Xaruntani waa tallaabo weyn oo loo qaaday dhanka horumarinta kaabayaasha xogta dalka, taasoo sii xoojin doonta awoodda dowladda ee isku xirka hay'adaha kala duwan iyo kaydinta xogaha muhiimka ah ee dalka. Waxaan u diyaar garoobeynaa mustaqbalka casriga ah ee ku dhisan xog iyo teknolojiyad."

Dhismaha xaruntan marka uu dhammaado, waxaa si degdeg ah loo guda geli doonaa qalabeynteeda, si ay ugu adeegto dowladda iyo hay'adaha kale ee dalka, iyadoo wax ka tari doonta hagaajinta maamulka xogaha muhiimka ah, lana jaanqaadaysa isbeddelka teknolojiyadeed ee caalamiga ah.





Tababarkii Dheeraa

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) iyo Machadka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada Qaranka (NTTI), iyagoo kaashanaya Ururka Caalamiga ah ee Isgaarsiinta Mobilka (GSMA), ayaa si rasmi ah u daah-furtay tababar sanad soconayay.

Tababarka oo qaab fogaan arag ahaa (online) ayaa la daah-furay 4-tii Janaayo, waxaana ka soo qeybgalay mas'uuliyiin sare oo ka kala socday GSMA, HIQ, iyo NTTI.

Maareeye Mustafa oo daah-furka ka hadlay ayaa yiri "tababarkan wuxuu noo oggolaanayaa inaan ka faa'iideysanno farsamooyinka ugu dambeeyay ee isgaarsiinta, taasoo noo fududeyneysa inaan si hufan uga jawaabno baahiyaha isgaarsiinta ee bulshadeena."

Tan iyo markii uu barnaamijkan bilowday bishii Janaayo ee sannadkan, 15 ka mid ah shaqaalaha HIQ iyo NTTI ayaa hal koorso qaadanayay bishiiba,

iyagoo dhammeeyay dhammaan koorsooyinka. Koorsooyinka la qaatay waxay kala ahaayeen:

1. Ka faa'iidaysiga Mobilka si loo gaaro Yoolalka SDG (Leveraging Mobile to Achieve SDG Targets)
2. Yareynta Farqiga u dhexeeya Jinsiga ee Mobilka (Bridging the Mobile Gender Gap)
3. Waxyaabaha Internetka ku xiran (Internet of Things) (IoT)
4. Wax ka qabashada Kala-qaybsanaanta Dhijitalka ah (Addressing the Digital Divide)
5. Lacagaha Mobilka ee Kabista Maaliyadeed (Mobile Money for Financial Inclusion)
6. Mabaadi'da Xogta Gaarka iyo Amniga ee Mobilka (Principles of Mobile Privacy and Security)
7. Isbeddelka Cimilada iyo Saameynta Warshadaha Mobilka (Climate Change and the Mobile Industry)
8. Maaraynta Hirarka ee Isgaarsiinta Mobilka (Spectrum Management for Mobile Telecommunications)
9. 5G: Jidka loo marayo Jiilka Xiga (5G - The Path to the Next Generation)
10. Doorarka Mobilka ee Gargaarka Bani'aadanimo (The Role of Mobile in Humanitarian Action)
11. Xuquuqda Carruurta iyo Isku-xirnaanta (Children's Rights and Connectivity)
12. Xogta Baaxadda Weyn iyo Garaadka Macmalka ah ee Saameynta Leh (Big Data and Artificial Intelligence for Impact)



Wadatashiyada AMNIGA INTERNETKA

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa soo gabgabeysay wadatashiyo ku saabsanaa aasaaska Xarunta Ka-Jawaabidda Xaaladaha Deg-degga ah ee Amniga Internet-ka (CSIRT), kaasoo socday muddo 3 cisho ah, 22kii ilaa 24kii Luulyo.



Xaruntan ayaa noqon doonta mid muhiim u ah xoojinta amniga internetka ee dalka, iyadoo diiradda saaraysa sugidda amniga kaabayaasha aasaasiga ah sida isgaarsiinta, maaliyadda, iyo kuwo kale.



Wadatashiyadan oo socday 3 cisho, waxaa ka qeybgalay daneeyayaal muhiim ah oo ka kala socday dhammaan hay'adaha dowladda, bankiyada, xawaaladaha, shirkadaha isgaarsiinta iyo internetka, iyo ururrada bulshada.

"Aasaasidda Kooxda CSIRT waxay calaamad u tahay horumar weyn oo ku saabsan dadaalladeenna joogtada ah ee lagu sugayo kaabayaasha qaranka," ayuu yiri Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasin Sheekh oo daahfurka wadatashigan ka hadlay, wuxuuna intaa ku daray "Kooxdan waxay noqon doontaa tiir-dhexaadka qaab-dhismeedkeenna amniga internet-ka, iyadoo ka jawaabaya xaaladaha amniga, ururinaya xogta amniga, islamarkaana yareynaya khataraha iyo nuglaanta teknoloojiyada."



Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknoloojiyada, Mudane Maxamed Aadan Macallin Cali (Soomaali), oo daahfuray wadatashiga, ayaa muujiyay muhiimadda xaruntan "Iyada oo ay sii kordhayaan weerarrada internet-ka ee caalamka, dhismaha kooxda CSIRT wuxuu yimid waqtigii loo baahnaa, sidoo kale xaruntan ayaa kaalin muhiim ah ka qaadan doonta ilaalinta xuduudaheena dhijitaalka ah iyo xoojinta ujeedooyinkeenna dhaqaale iyo amni qaran," ayuu yiri wasiirka.



SHIRWEYNAHA Hay'adaha ISGAARSIINTA Adduunka (GSR2024)



Maareeyaha Guud ee HIQ, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa ka qeybgalay Shirweynaha Hay'adaha Isgaarsiinta Adduunka (GSR-2024), ee lagu qabtay Kambaala 4 luulyo, kaas oo uu soo qabanqaabiyay Midowga Isgaarsiinta Adduunka (ITU).

Shirkan oo lagu qabtay Magaalada Kambaala ee dalka Yugandha, ayaa waxaa isugu yimid madaxda hay'adaha isgaarsiinta adduunka, iyagoo isku dhaafsanaya waayo-aragnimadooda la xiriirta horumarradii ugu dambeeyay ee nidaaminta qeybaha isgaarsiinta iyo teknoolajiyada.



Mudadii uu socday shirku waxa uu maareeyuhu ka qeybgalay dhowr dood-cilmiyeed oo looga hadlay hababka sameynta xeer-nidaamiyaal waxtar leh oo suurto gelinaya nidaam isgaarsiin oo dhijitaal ah oo ammaan ah islamarkaana loo dhanyahay iyo xalalka caqabadaha nidaaminta isgaarsiinta ee sahlaya kobaca dhaqan-dhaqaale ee dalalka.

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), oo kaashanaysa Machadka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada Qaranka (NTTI), ayaa soo qabanqaabisay dabaaldegga Maalinta Gabdhaha ICT-da.

Munaasabaddan ayaa qayb ka ah olole sannadle ah oo uu bilaabay Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah, kaas oo loogu talagalay in lagu dhiirrigeliyo laguna xoojiyo sidii haweenku uga qaybqaadan lahaayeen teknolojiyada.

Munaasabadda aawadeed ayay HIQ qabatay tababaro lacag la'aan ah oo ka faa'iidaysteen in ka badan 70 gabdhood. Maaddooyinka tababarka lagu bixiyay waxaa ka mid ahaa: horumarinta websaytka, amniga internetka, naqshadeynta garaafyada, fagaare ka hadalka, CV qorista, shabakadaha kombiyuutarka, cilmiga xogta iyo falanqaynta (Data Science and Analytics), iyo kuwo kale.

Shayma Cabdi Salaad ayaa ka mahad celiysay in sanadkii 2aad ay fursad u hesho ka qaybgalka tababarkan, waxayna xustay inay wax badan ka faa'iideysteen iyada iyo gabdhihii ay tababarka ka wada qaybgaleen. "Aqoonta aan kororsaday waxaa ii dheeraa in aan saaxiibo badan oo aan isku mihnad nahay aan halkaan ku bartay" ayay tiri Shayma.

Dabaaldeggan Maalinta Gabdhaha ICT-da, oo ah tiir muhiim ah oo ka mid ah dadaallada Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ee lagu dhimayo farqiga dhijitaalka ee u dhexeeya ragga iyo dumarka



Maalinta Gabdhaha ICTda

Soomaaliya. Tan iyo 2018, Hay'addu waxay u diyaarisay in ka badan 370 gabdhood oo da'yar xirfadaha lagama maarmaanka ah si ay ugu fiicnaadaan qaybta ICT-da.

Sida laga soo xigtay daraasad uu daabacay Ururka Caalamiga ee Isgaarsiinta (ITU) sanadkii 2022, farqiga joogtada ah ee u dhexeeya ragga iyo dumarka ee ku aaddan isticmaalka internetka ayaa la iftiimiyay, iyadoo la sheegay in 34% dumarka Afrika ay isticmaalaan internetka marka la barbardhigo ragga oo iyaguu isticmaala 45%.

Intaa waxaa dheer, ku dhawaad 900 milyan oo haween ah oo daafaha adduunka ku kala nool

ma isticmaalaan internetka mobile-ka, iyadoo seddex meelood labo ka mid ah ay ku nool yihiin Koonfurta Aasiya iyo Afrikada - hoose.

Si kastaba ha ahaatee, Ururka GSMA ayaa ku qiyaasay in si loo yareeyo farqiga internet-ka ee mobile-ka ee u dhexeeya ragga iyo dumarka marka la gaaro 2030 dalalka dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa dhexe, loo baahan yahay in qiyaastii 810 milyan oo haween ah oo dunida ku kala firirsan loo fududeeyo sidii ay u isticmaali lahaayeen internetka mobile-ka, taasoo u dhiganta ku dhawaad 100 milyan oo haween ah sannadkiiba.





Aqoon isweydaarsi fogaan arag ah Tilmaamayaasha Qiimaha Adeegyada ICT-da.

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), oo kaashanaysa Guddiga Dhaqaalaha iyo Bulshada Qaramada Midoobay ee Galbeedka Aasiya (UN-ESCWA), ayaa qabtay aqoon isweydaarsi fogaan arag ah oo ku saabsan Tilmaamayaasha Qiimaha Adeegyada ICT-da.

Aqoon isweydaarsigan ayaa waxaa ka qeybgalay daneeyayaal kala duwan oo ka tirsan qaybta Isgaarsiinta iyo ICT-da ee dalka, oo ay ku jiraan shirkadaha isgaarsiinta ee shatiga haysta iyo bixiyeyaasha adeegga internetka.

Kulankan ayaa looga dooday islamarkaana lagu ansixiyay tilmaamayaasha muhiimka ah ee sicirka, kuwaas oo muhiim u ah maamulka hufan ee qiimaynta adeegyada isgaarsiinta ee dalka.


Furitaanka aqoon isweydaarsigan ayaa waxaa ka hadlay Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane



Mustafa Yaasiin Sheekh, isagoo ku dheeraaday muhiimadda uu aqoon isweydaarsigan u leeyahay qaabaynta mustaqbalka isgaarsiinta Soomaaliya.


"Waxaan haysannaa fursad gaar ah oo aan ku saameyn karno xeeladaha lagu maamuli doono isgaarsiinteena sanadaha soo socda," ayuu yiri Mudane Mustafa.

"Iyadoo loo marayo wada-shaqeyn, wadahal furan,



dhismeed sharciyeed oo kor u qaadaya qiimo caddaalad ah iyo kor u qaadidda hal-abuurka, dhiirigelinta tartanka suuqa caafimaadka leh, iyo hubinta in qofna aan laga tegin casrigan dhijitaalka ah."

Aqoon-isweydaarsiga ayaa waxaa lagu soo bandhigay khudbado iyo doodo ku saabsan mowduucyo kala duwan oo ay ka mid yihiin hababka tilmaamayaasha qiimaha ICT-da, hab-raaca kala-soocidda xisaabaadka, iyo xeerar la soo jeediyay oo ku saabsan qiimaha adeegyada isgaarsiinta iyo wadaagga kaabayaasha dhaqaalaha Soomaaliya.





Warbixinta Tilmaamaha Qiimaha Adeegyada Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada Soomaaliya (Somalia ICT Price Basket Indicators: Methodologies, Guidelines, and Performance), oo ay diyaarisay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ee Soomaaliya iyada oo kaashaneysa Guddiga Dhaqaalaha iyo Bulshada ee Qaramada Midoobay ee Galbeedka Aasiya (ESCWA), waxay bixinaysaa falanqeyn dhammeystiran oo ku saabsan qiimaha adeegyada Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada Soomaaliya iyada oo la adeegsanayo habraacyo caalami ah oo la aqoonsan yahay.

Ujeedooyinka Muhiimka ah

Ujeeddada warbixintani waa in lagu qiimeeyo awoodda wax iibsiga iyo helitaanka adeegyada isgaarsiinta ee Soomaaliya iyada oo la adeegsanayo habraacyo caalami ah oo la aqoonsan yahay, gaar ahaan kuwa uu dejiyey Ururka Horumarinta Dhaqaalaha iyo Iskaashiga (OECD) iyo Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU). Ujeeddada guud waa in la helo go'aanno siyaasadeed ee xog ku dhisan si loo kobciyo qiimayaal tartan ku saleysan, loona hagaajiyo hufnaanta suuqa isgaarsiinta ee Soomaaliya.

Habraacyada:

1. Habraaca OECD:

- OECD waxa ay isticmaashaa habka "Isbarbardhigga Qiimaha Alaabta iyo Adeegyada" si ay u qiimeeyso qiimaha adeegyada internet ka baaxadda weyn (broadband) ee guryaha iyo moobeelka. Habkan waxaa lagu saleynayaa qaabka isticmaalka waxaana marar kala duwan dib loogu habeeyaa si loo waafajiyo isbeddellada suuqa.
- Habkan waxa loo isticmaalaa adeegyo ay ka mid yihiin taleefoonka guriga, wicitaanada mobilka, xogta, iyo khadadka teleefoonada aan guurguurin.

2. Habraaca ITU:

- Habka ITU, oo dib loo cusbooneysiisay sannadkii 2021, wuxuu diiradda saarayaa adeegyada Internet ka Baaxadda weyn (broadband) ee guryaha iyo mobilka, iyadoo la isbarbar dhigayo xirmooyinka ugu jaban ee la heli karo kaas oo buuxiya shuruudaha xogta.
- Habkan waxaa ka mid ah Internet ka baaxadda leh (broadband) ee guryaha (ugu yaraan 5 GB) iyo mobilka (ugu yaraan 2 GB).

Natiijooyinka Muhiimka ah:

- Habka OECD: Adeegyada mobilka ee Soomaaliya ayaa ka jaban kuwa celceliska wadamada Carabta, taasoo muujinaysa in adeegyada mobilka ee Soomaaliya ay yihiin kuwo la awoodi karo. Laakiin, adeegyada Internet ka baaxadda leh (broadband) ee guryaha Soomaaliya ayaa aad

qaali u ah, qiimayaashoodu waa kuwo ka badan kuwa wadamada Carabta iyo kuwa caalamka. Qiimahaas oo gaaraya 76.6% GDP-ga ee qof kasta.

- Habka ITU: Warbixintu waxay muujineysaa in heerka Soomaaliya uu hooseeyo, marka loo eego adeegyada xogta internet-ka keliya ee mobilka iyo kuwa taleefoonka, iyadoo qiimaha adeegyadaas uu ka badan yahay shan jeer celceliska gobolka.

Talooyin Muhiimka ah:

1. Horumarinta Siyaasadda: Waa lagama maarmaan in la dejiyo siyaasad cad oo ku wajahan hagaajinta awoodda wax iibsiga ee adeegyada xogta internet ka (data) ee baaxadda leh (broadband) iyo kan guryaha.

2. La Socoshada Qiimayaasha: Waa in si joogto ah loo kormeeraa qiimaha adeegyada xogta internet-ka (data) hab ku saleysan habraacyada caalamiga ah si Soomaaliya u sameeyso go'aanno xeerndamineed oo xog ku saleysan si kor loogu qaado horumarka isgaarsiinta iyo Tiknoolojiyadda.

3. Kala Soocidda Xisaabaadka: Waa muhiim in la sameeyo tilmaamo cad oo ku saabsan kala soocidda xisaabaadka si loo hubiyo hufnaanta, iyo tartan cadaalad ah oo ka dhex jira shirkadaha isgaarsiinta.

4. Dib-u-eegista Xeerndamiyeyaasha:

Xeerndamiyeyaasha qiimaha adeegyada waa in si joogto ah dib loogu eegaa loona cusbooneysiisaa si ay ula jaanqaadaan horumarka tiknoolajiyada, loona hubiyo inay waxtar ku leeyihiin tartanka suuqa.

Warbixintan waxay muujinaysaa baahida degdegga ah ee loo qabo in la sameeyo faragelin siyaasadeed ah (policy intervention) iyo dib-u-eegista xeerndamiyeyaasha si loo hagaajiyo awoodda wax iibsiga ee adeegyada, loona kobciyo suuqa tartanka leh ee Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada ee Soomaaliya.

Hirgelinta talooyinka waxay gacan ka geysan doontaa horumarinta balaaran ee dhaqan-dhaqaale, iyadoo la hubinayo in muwaadiniinta oo dhan ay si siman ugu heli karaan adeegyada isgaarsiinta iyo xoojinta kaalinta Soomaaliya ee horumarka dhaqaalaha dhijitaalka ah ee gobolka.

Waxqabada Sanadkii Tegay
2024

01

HIQ oo heshay shahaadooyinka Caalamiga ah ee ISO/ISMS, ISO/PIMS, iyo ISO/QMS.

02

Soomaaliya oo ka mid noqotay hoggaanka Hay'ad Caalami ah

04

Bilaabidda qorshaha hirgelinta Xarunta Ka Jawaabidda Xaaladaha Degdegga ah ee Amniga Internetka (CSIRT).

03

Hubinta iyo korjoogteynta adeegyada Isku-xirka shirkadaha isgaarsiinta ee dalka ka howlgala.

05

Diyaarinta Qorshaha Qaran ee Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga ah ee Soomaaliya (NETP).

07

Qabashada tabantaabada madasha Hab-maamulka Internetka Soomaaliya.

06

Ka shaqeynta qeybta isgaarsiinta ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP).

08

Hay'adda Isgaarsiinta oo ka mid noqotay Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika (EACO).

09

Madax qaybeedyada iyo Shaqaalaha hay'adda oo ka qaybgalay tababarro iyo shirar caalami ah

10

Bilaabidda Dhismaha Xarunta Cusub ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

11

Diyaarinta Qorshaha Istaraatiijiyadda Isbeddelka Awoodda Korjoogteynta ee Hay'adda.

12

Soomaaliya oo ka mid noqotay waddamada laga fulinayo Hindisaha Digniinta Hore ee Loo dhan yahay (EWS4All)

13

Qabashada Madashii labaad ee Amniga Internetka Soomaaliya.

15

Qabashada tabantaabada madasha Hab-maamulka Internetka Soomaaliya.

14

Martigelinta wafdigii Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika (EACO), ee Muqdisho yimid.

16

In ka badan 70 gabdhood oo ka faa'iidaystay tabarro lacag la'aan ah oo ay Hay'addu qabatay.



Warsidaha
ISGAARSIIN

Cinwaan:

- @ : info@nca.gov.so
- 🌐 : <http://www.nca.gov.so>
- 📘 : Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
- 🐦 : @SomaliaNCA